# Golaha Wakiiladda

## Waaxda Shuruucda, Fadhiyada iyo Hadal-qoraalka

***Golihii 5aad ee Wakiillada, Kal-fadhigii 2aad fadhigii 20aad***

***Wakhtiga uu Furma:-*** 09:47 AM
***Taariikhda:- Sabti 29 January 2022***

**Gudoonka: -** Mudane, Cabdirisaaq Khaliid Axmed

**Quraanka: -** Md. Sh. Axmed Dayib

**Ajandaha Fadhiga:-**

- **Doodda Xeerka Ilaalinta Xuquuda Caruurta.**

**Md. Cabdikariim Meecaad Xuseen (3min 24sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim Asalaamu Calaykum Waraxmatu laahi Wabarakatu,

Lifaaqa lasoo gudbiyey iyo xeerkii hore markaan akhriyey waxaan filayaa waxaa ka maqan farqad dhan oo muhiima waxaan jeclan lahaa in la raaciyo Qodobka 15aad farqada 4aad Waxaana weeye farqadaasi gudiga daryeelka caruurta waa inay sameeyaan habraaca lagu xakamaynayo dacaayadaha loo geysto caruurta, waad ogtihiin marka schoolada lajoogo caruurtu way is cayaayaan.

*Waxaan soo jeedin in lagu daro farqada iyadoo laga hor tagayo in aan ilmaha lagu caayin sida ilaahay u abuuray Lana gaadhsiiyo goobaha waxbarashada laguna waajibiyo macalimiinta inay talaabo ka qaadaan Lana socodsiiyaan gudiga caruurta sida joogta ah.*

**Qodobka 11aad** xaqa waxbarashada dawladu waxay u xil saaran tahay sidii caruurta aan ka korin da'da waxbarashada ay u heli lahaayeen waxbarasha Aas-aasiya oo sida Dastuurku uu waajibiyey. Halkaa waxaan ku darayaa ama aan soo jeedinayaa in waxbarasho qasab ah 1-8 waxaynu maraynaa qarnigii 21aad caruurtenuna may helin waxbarasha kufilan marka waa waajib waxbarashada Aas-Aasiga ee caruurtu.

Soo jeedintii gudiga waxay ku ekaysiiyeen **Qodobka 33aad**, **Qodobka 34aad** baa ku jirey oo odhanayaa xilka iyo waajibaadka gudiga waxaa weeyi ujeedadii loo asaasay gudiga qaran ee xuquuqda caruurta waxaa lagu faah faahinaya xeer-nidaamiye uu soo saaro wasiirku kadib marka uu la tashado isla markaana uu la kaashado haayadaha ay khusayso gudigaa in lagu daro waajibaadkooda inay sameeyaan guddi tarbiyadeed gudigana waajibaadkooda in lagu daro inay sameeyaan manhaj tarbiyadeed oo heer qaran ah oo dalka oo dhan ka shaqaynaya.

**Md. Xasan Axmed Cilmi (Xasan kayse)** **(7min 41sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, hadan guda galo xeerka **Qodobka 3aad farqadiisa 3aad** oo odhanaysa xeer xaqiijinaya isla markaana jidaynaya daryeelka caruurta; *Halkaa waxaan ku darayaa in lahelo xeer xaqiijinaya isla markaana sheegaya horumarka iyo daryeelka caruurta horumarkaa oo noqonaya dhinaca waxbarashada daryeelkuna uu noqonayo dhinaca caafimaadka*

**Qodobka 6aad farqadiisa 5aad** wasaarad kasta waxay abuuraysaa habkasta iyo hal beeg kasta oo lagu ilaalikaro xaquuqda caruurta; *waxaan halkaa kudarayaa wasaarada shaqa gelinta waxay abuuraysaa Hanaan kasta qaab dhismeed kasta iyo hal beeg kasta oo lagu ilaalinayo xuquuqda caruurta oo aan ka hor imaanayn shareecada islaamka iyo dastuurku dalka,* halkaa waxaa lagu cadaynaya oo soojeedin taydu tahay magaca wasaradda shaqada sida toos ka ah u leh ee wasaradda shaqa gelin arimaha bulshada iyo qoyska.

**Qodobka 7aad farqadiisa 2aad** waalidku wuxu waalidnimadiisa u gudanayaa si waafaqsan Dasturka ee ka hor imanaya shareecada islaamka halkaa waxaa kamaqan ee aan ka hor imaanayn shareecada islaamka si fahankisu u noqodo mid lawada fahmi karo waxa halkaa lagu darayaa **AAN.**

**Qodobka 8aad** ee xaqa cadaynta waalidnimo, Ilmakasta waxaa xaq uleeyahay in loo cadeeyo waalidku dhalay dhalay hadii ay dhacdo xaaladahan soo socda marka waxaan soojeedin in **DHALAY DHALAY** daa meesha mid laga saaro

**Qodobka 18aad farqadiisa 1aad** caruurtu waxay xaq u leeyihiin in loo ilaaliyo shacaa'iirta islaamiga ah iyo ku toosnaanta diinta suuban xiliga korinta iyo kahor inta qaangaadhin masuuliyadooda gaarka ah waalidku gacanta kuhayo *waxaan halkaa kusii darayaa iyo haayadii markaa gacanta ku haysa,* hadii markaa haayad gacanta ku hayso ama school lagu xanaaneyo

**Qodobka 20aad** xaqa dhalashada iyo aqoonsiga waxaa layidhi qofkasta wuxuu xaq u leeyahay in magac loo bixiyo si rasmiya soo jeedintaydu waxaa weeye *magaca ilmaha loo bixinyo waa inuu noqdaa mid ku haboon diiniyan iyo hidaha somaliyeed oo ilmuhu cuqdad ka qadayo, hadaad ubixiso magac sharaftiisa iyo diiniyan aan ku haboonayn markaa waa in magac diinteena ku qotoma loo bixiyaa ilmaha*

**Qodobka 21aad** ilma kasta xaq wuxuu u leeyahay in uu helo waxbarasha diimeed iyo mid maadi ah oo Aas-Aasi ah, markaa waxbarasha diimeed *waxaan leenahay diintu waa tee? waa in lasheego oo layidhaa Diinta islaamka.*

**Md. Axmed Cabdi Ibrahim (Tima-jilic)** **(6min 33sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, mahadsanid guddoomiye, Wasaaradu waxay wada shaqayn buuxda layeelanaysaa wasaarada iyo hay'addaha la shaqeeya ee dawlada, *halkaa waxaan ku daray iyo mutadawiciinta kale ee la shaqeeya*

**Qodobka 8aad** xaqa cadaynta waalidinta *Waxaan soojeedin in la yidhaa Hadii laba qof ama laba qoys isku qabsadaan ilme iyadoo looracayo xaalada sharciga jideeyey*

**Qodobka 9aad** masuuliyada qoyska marka ay ilmaha waalidkiisu dhintaan ama aanay awood u lahayn inay daryeelaan *waxaa ku daray, waxaa qaranka ku waajiba ilaalinta, daryeelka, xanaanaynta iyo dayactirkooda oo ay tahay in loo sameeyo school iyo goobo lagu xanaaneyo laguna daryeelo*

**Qodobka 11aad** waxaan soo jeedinayaa in lagu darro **QAAN-GAADHNIMADIISA**

**Qodobka 15aad** xaqa in laga ilaaliyo ilmaha dayacaada, *Waxaan Abdikariim ku raacsanahay in lagu daro Qodob sheegaya in ilmaha aan la caayi karin khaasatan hooyadii.*

**Qodobka 16aad** xaqa xoriyada iyo amniga ilmaha, ilma kasta wuxuu xaq u leeyahay xaqa xoriyada iyo amniga qof ahaaneed ***waxaa halkaa ka dhigay ee Dastuuri ga ah***. Isla qodobka ilma lama xidhikaro lagama qaadikaro xoriyadiisa hadii aanay dantiisu kujirin *waa sax qodobkaasi*

**Qodobka 17aad** xaqa diiwaangelinta dhalashada xaaladahan xaqiijinta da'da ilmaha waxaa loo racayaa xogta diiwaanka ilmaha sida suurtagalka ah ***waxaan odhan lahaa suurtagal bilaa ceeba ah.***

Isla qodobka in lagu barbaariyo baarinimo iyo masuuliyada gudasho si marka uu weynado uu guto masuuliyada kasaaran shareecada islaamka iyo dantiisu gaarka, *halkaa waxaan ku daray dantiisu, diintiisa, dalkiisa, dantiisu gaarka ah iyo danta guud ee qaranka.*

**Qodobka 21aad** xaqa waxbarashada dawlada ayaa xilka saaranyahay sidii caruurta aan ka korin da'da waxbarashada ay u heli lahaayeen waxbarashada Aas-Aasiga ah ee Dastuurku uu waajibiyey iyado aan marna laga tegayn waxbarashada sare. ***waxaan soojeedin in ardaydaa in ama farsamo gacanta ama masaajida wax uun labaro.***

**Qodobka 24aad** xaqa ilaalinta caruurta baahiyaha gaarka ah qaba waxaan soojeedin in caruurta qaxootiga ah iyo muwaadinintu kara gaar noqdaan, *marka waxaan halkaa ku daray caruurta qaxootiga ah waxay yeelanayan xuquuqda qaxootinimo iyadoo la dejinayo xeryo qaxooti school iyo guryo kumeel gaar ahna lasiinayo, caruurtada socotada ahna waxa keliya ee yeelanayan xaqa haynta intay joogaan ee uu inadhaafayo ee dalkiisa ku laabanayo.*

**Qodobka 27aad** ilma kasta wuxu xaq u leeyahay inuu helo adeegyo caafimaad oo ku haboon marka ay laso gudboonato xaalad caafimaad oo u muuqankarta mid aan dawo lahayn, waxaan odhan lahaa madama xaaladu tahay mid aan dawolahayn ***waxaan odhan lahaa oo ku haboon xaalada taagan***

**Qodobka 33aad iyo Qodobka 37aa**d gudiga ilaalinta xuquqda caruurta, waxaan ku raacsanahay sida ay guddidu u dhigtay.

**Md: faysal Yusuf jamac (4min 43sec)** Waad mahad santahay mudane gudoomiye iyo mudanayaal gudoomiye anigu waxan kudari lahaa, waana kuraac sanahay sidaa aya usoo qoreen gudidu siwangsan bay usoo qoreen.

Waxan kudari lahaa hal qodob oo aan odhan lahaa halagu kordhiyo xeerkan, qodobkaasi waxa weeye, waa qodob kahad laya caruurta kasoo noqota qurbaha ee reer Somaliland, waxa dhacda had iyo goor in laga daba yimaado, oo si ay ugu cawdaan dalalkii ay baasa-boorka ka haysteen iya goo markii horeba, waalid kood kala soo bax sadeen diin la-aanta meesha kajirta, waxa dhacda in laga daba yimaado caruurtii oo Somaliland joogta, oo layi dhaahdo caruurtaa, dalkaasay udhasheen waan celi naynaa, Taa waxan odhan lahaa inaynu soo-jeedino ama xeer keena kudarno.

Maadaama aynu nahay qaran jira, ama dawlad nahay inaan la celin Karin ilmaha Somaliland udhashay ee reer Somaliland hadii-aan waalid kiisu raali ka ahayn, sida dhacday ama aynu ognahay, wayba ka adag yihiin waalid kood marka dibadaha joogon, laakiin halakan marka aynu joogno dal islaama baynu nahay, inaynu kudarno qodob xaqiijinaya in ilmaha waalid kii qabto, oo aan lacelin Karin isgoo dalkiisii jooga oo aan raali laga ahyn.

Qodobkaa waxan sii raacin lahaa qodobkale oo ah, waxa jira schoolo aynu leenahay oo boodhina, dadka masuulka ka ah iskuuladaa waa inay yihiin dad Muslima, dadcadaana wax way udhigi karaan, laakiin masuuliyada inay qaadaan dad muslimiina manhajaka lagu dhigayaana waa inuu noqdaa manhajka Somaliland.

**Qodobka 5aad** xeerkani waxa uu waafaqsanyahay mabaa diida guud iyo shareecada islaamka.

**Qodobka 8aad** oo kale waxan kudari lahaa oo kale farqada B iyo T marka ilmaha laysku qabsado, loo raaco shareecada islaamka iyo wax yaabaha kale ay jidaynayso ee ay kamid tahay in qofkii laga qaado DNA taa gudigu way saxeen.

**Qodobka 15aad** xaqa in la ilaaliyo ilamaha, lagana ilaaliyo dayacaada farqadiisa 3aad gudiyada xuquuqda caruurta heerqaran iyo heer gobolba waa inay qorsheeyaan oo ay kobciyaan ololayaal wacyigelineed oo ku aadan dacyactirka caruurta.

**Qodobka 16aad** way saxeen gudidu waana kuraac sanahay, sidii aan usoo qoray bay usoo qoreen waana kuraacsanahay.

**Qodobka 21aad farqada 3aad** dawlada ayaa xil kasaaran yahay, sidii caruurta aan dhaafin dada wax barashada sidii ay uheli lahaayeen waxbarasho aas aasiya.

*halakaa waa in laga dhigaa waxbarasho dhamaystiran ilaa jamacad*.

**Qodobka 23aad farqadiisa 2aad** ilmaha aan lahayn labadiisa waalid waxa uu xaq uleeyahay inuu helo daryeel waalid nimo oo dhamays tiran, iyada oo mud naanta

lasiinayo eheladiisa, sida waa faqsan **qodobka 9aad** farqadiisa 3aad, qodobkaa maan fahmin qodobka uu yahay ma qodobkan xeerkanaa mise waa qodobkale, qodobka 9aad farqad 1aad mooyaane farqad sadexaad male.

**Qodobka 26aad** xaqa nolosha gaar kaa, ilmuhu waxa uu xaq uleeyahay noloshiisa gaar kaa, waa in laga ilaaliyaa fara gelinta sharcidaradaa ee ku keeni karta wax yeelo sharafeed magac xumo iyo sumcad dil.

**Qodobka 31aad farqadiisa 4aad** xogaha laxidhiidha ilmaha waxa loo kaydinayaa, loona gudbinayaa sida waa faqsan shareecada islaamka markaa inay gudidu kudareen baan filayaa.

**Qodobka 33aad** gudida qaran ee ilaalinta xuquuqda caruurta anigu waxan odhan lahaa halaga dhigo 7 xubnood oo halaga sii yareeyo 9ka xubnood, aad baad umahadsantihiin muda nayaal.

**Md. Cumar jamac faarax: (2min, 16sec) Bismilahi** raxmaani raxiim Qodobka 9aad oo udhignaa caruurta dayacan inay daryeelaan ehelka ilmaha, Halkaa waxan ku bedelilahaa in lahelo xarumo dawladeed oo lagu daryeelo caruurta, waayo caruurta qaarbaa jira aanaan waalidba xidhiidh la lahayn oo cidla laga helay, dawladu iyadaa masuul ka ah caruurahaa.

***Halkaa waxan soo jeedinlahaa in lahelo xarumo dawladeed oo lagu daryeelo caruurta aan lahayn waalid, ama awood ulahyn xanaanaynta caruurta iyadoo maxkamada laga soo xaqiijinayo inaan ilmahaasi aanu lahayn waalid, markaa in laga dhigo cida masuuliyada qaadi karaysa waana dawlada taasi xarumana loo sameeyo, halkaasi waa qodobka 9aad.***

**Qodobka 11aad** kelmada ah gaar ahaan dacwada idaariga ah iyo kuwa qarsoon, *halkaa idaariga ah waa in laga dhigaa dacwadaha maamulakaa, idaarigana laga bedelo Ayaan soo jeedinlahaa*.

**Qodobka 11aad xarafkiisa 2aad** halkan wax kuqoran ilmakastaa waa inuu raad sadaa gudbiyo xog iyo aragti katurjumaysa xaga shareecada iyo nidaamka wanagsan ee caruurta yar yar ee aan qaan gaadhin awood na ulahyn inay kuraad sadaan oo isku difaacaan.

***Waxan soojeedin lahaa waa inlahelo qareen udooda, oo dareen kooda, katurjuma baahiyahooda, udooda waayo ilmayari isgu iskuma doodi karo xogtiisana maraad san karo halkaana waa in loo qabto qareen xogtooda iyo baahiyahooda ururiya unadooda, aslamucalykum.***

**Md: Xuseen Ismaaciil Jamac (4min 06sec)** Bismilaahi raxmaani raxiim mudane gudoomiye waad mahadsantahay saxaafadana waan salamaya aslmucalykum.

Inta badan qodobada ay gudidu soo jeedisay waan ku waafaqsanahay marka laga reebo 4qodob ilaa 3qodob Ayaan soojeedin kasamayndoonaa hadii allh idmo waxa aan marka hore rabaa inaan isku waafaqsanaano xage xeerka oo uu cin waan kiisu yahay qabyo qoraalka xeerka caruurta, hadana, marka gudaha aad eegto qodobada waxa uu qorayaa ilmo, ilmuhu waa inuu sidaa noqdaa ama waa inaynu ilmo ku eekaano ama waa inaynu caruur ku eekaano.

***Waxan soojeedinayaa in laqaato kelmada ciwaanka xeerku yahay ee xaquuqda caruurta oo ay qodobadoo dhami saamayn aykamuuqan karto oo ilmaha lagasaaro, waayo ilmaha fahan ahaan waxa loo haystaa inuu yahay 5jir ilaa sanad jir uuna kaweynayn.***

Qodobka 21aad oo kahadlaya xaqa waxbarasho ee caruurta, aas aasa, ***waxan raacinayaa oo bilasha ayuun baan kudaray.***

Qodobka 33aad oo kahadlaya hay ada uxilsaaran daba galka xuquuqda caruurta, iyo masuuliyado farabadan oo kala duwan waybadantahay hadtahay xadgudub waxbarasho iyo haday tahay baahiyahooda aas aaskaa, masuuliyada dawlada ayay tahay inay daba gal kusamayn karaan mushkiladaha haysta caruurta.

Waxan soo jeedinayaa in lasameeyo (commission) uxil saran maamulka iyo xalinta mush kiladaha caruurta.

***Waxan kudarayaa qodob aan kujirin xeerka oo kusaab san xaga amniga ee caruurta sida aynu kawarqabno bulshada wadanka kunooli isku dhaqaale maaha  isku dhaqan maaha isku hayn aduuna maaha sidaa daraadeed waxa waajiba inay caruurtu hesho hoy ku haboon noloshooda si  ay uhelaan amni iyo meelay kuladikarayaan hurdo ahaan, markaa sidaa daraadeed waxan soo jeedinayaa in qodobkaa lagu daro, in ay caruurta reeraha dhaqaalahoodu uu liito inay helaan hoy amni, arintaana waxa uxilsaaran dawlada dhexe iyo hay- adaha caalamigaa iyadoo toos loo abaarayo qoysaska dhaqaalahoodu aad uliito.waad mahadsantihiin .***

**Md. Ibraahin Maxamed Jaamac (3min 23sec):-** Asalaamu Calaykum Waraxmatu laahi wabarakatu, Aad ayaan kaaga mahadnaqayaa mudane Gudoomiye fursadaa aad isiisay, Anuu waxaan jecelahay inaan dhawr qodob dul istaago,  inkastuu yahay qodobka lala eegay diinta islaamka. Qaangaadhka,

Horta da'da weynu isla wada ognahay oo waa15 marka loo eegayo diinteena islaamka, astaamaha qaangaadhka ilma weynu ognahay oo da'da uu ku qaangaadha waa 15 diinteena islaamka mararka qaar waxaa laga yaaba ilmuhu isagoo aan qaan gaadhin in laga helo astamihii qaan gaadhnimada, lakin marka lagaga hadlayo Qaan gaadh (Maturity) waxa weeye (Mantel capacity-ga) oo ah in qofki yahay qof isku filnaan kara.

Wadamada aduunka iyagoo isticmalaya kuna sarjaraya wakhtiga qofka caqligiisu ku korikaro  tacliintiisuna gaadhayso grade 12-ka, lakin 18 bay inta badan isla qaataan iyo wixii ka weyn as Adult hadii kale na waa as child inaga madama ubadkeenu ay galaan denbiyo ilaa dil ay galaan waxaa in lagu xisaabtamaa 15-ka oo waa wakhtigii  diiniga ahaa oo inagu teena aynu raacaynaa, lakin qodobka kale inagu marna dastuurkeenana

ku qori mayno madama uu ina farayo qodob kasta oo khilaafaya shareecada waa waxba kama jiraan. oo diinteena iyo shareecada aynu marka hore ba ku sal goynaa.

Qodobka kale masuuliyada guud waxaa iska leh dawlada inay ilmihii ilaaliso, Lakiin anuu weli ma arag wax workers gaar u ah ama ushaqeeyayaal gaara oo caruurta u shaqeeya duruufahoodana ogaada kan derbi jiifka ah kan guriga waalidkii dhib ku qaba madama aynu maalin kasta aragno nin caruurtiisa bud la dhacaya sidaynu ognahay dhawacasi wuxu ku yeelankaraa samayn.

Beryahan dame waxaaba caruurta iskaga badan kufsiga iyada oo marka dame lagu dhamaynayo wada hadalo dhaqan iyo wax noocaas ah.

Markaa waa in loo sameeyo ushaqeeyayaal gaara oo hoosyimaada wasaarada arimaha iyo qoyska oo mar walba xuurama kan dibada jooga kuwa school da dhigta si dhaw ula shaqeeya wasaradda waxbarashada intaa ayaan ku soo koobayaa soo jeedimahayga waad mahadsantihiin.

**Md. Cabdikariim Aadan Cali** **(4min 12sec):-** **Qodobka 2aad**: Mudane guddomiye iyo Mudanayaal, Sida aynu la wada socono Ummad kasta ama qaran kasta waxa ay leeyihiin dhaqan, fahamnololeed, taariikh iyo qiyam ay ku saleeyaan xeerarka ay u dejinayaan bulshadooda gaar ahaan da'yarta ay rabaan in aynoqdaan kuwa nolosha ummaddooda haka ay kolba joogto ka sii wadaan.

Ummadda Somaliland waa Ummad Muslim ah waxaanan ku bilaabayaa, marka kowaad:

1. Carrurtu waxay ka kooban tahay lab iyo dhaddig. Haddise ay dhacdo xaalad jidh ahaan iyo maskax ahaan u dhexaysa.

B. Waa in waalidka amaba masuulka ilmuhu waa in uu u soo gudbiyaa hay'daha ay khusayso, waxaana waajib ku ah in ay caawimada caafimaad, bulsho iyo wax barasho amaba bar baarineed ee uu ilmahaase u baahanyahay la siiyo isga iyo qoyskaba iyada oo lala tashanaayo waalidka iyo ilmahaba iyada oo la tix gelinayo duruufha u gaarka ah , heerka fahamkiisa iyo da'diisaba.

2. Carrurta Xeerku u jeedaa waa carrurta joogta Wadanka Somaliland oo ay ka mid yihiin kuwo u dhashay, kuwo deggan iyo kuwa si ku meel gaadh ah u jooga iyada oo aan loo eegin Meesha ay ku koreen, ku dhasheen, afka ay ku hadlaan iyo siffe kale oo lagu kala saaro midna. Waxa ka mid ah:
   a. Carrurta Magaalada, Miyiga, Qurbaha kasoo laabtay.
   b. Carruurta ku dhalatay Qurbaha ee Wadankan ka soo jeeda waxa loo aqoonsanayaa in ay yihiin carrur waddan kan u dhashy oo dhala shadooda koowaad tahay, Somali, reer Somalland ah.

c. Waa in Dawladdu diyaariso in Kaadhaka Dhalashada iyo Baasaboorada Somalialand lagu diyaariyo dhammaan xafiisyada ay Jamhuriyadda Somaliland ku leedahay dadlaka Kale ee dunida lana xaqiijiyo in la diiwaan geliyo ilme kasta oo kudhasha amaba deggan wadamaad debedda.
d. Carrurta ku dhalata miyiga iyo tuulooyinka waan loo sameeyaa diiwaan gelin, looguna diyaariya xafiiska Degamada, Guddomiyaha Tuulada amaba Talsika Booliska ee ugu dhow si loohubiyo in carruurta Somaliland si isku mid ah u hesho diwaan gelin isku mid ah.
e. Carruurta Somalida ah ee aan u dhalan Somaliland, ee jooga amaba deggan waddaan Jamhuriyadda Somaliland waa in loola dhaqmo sida Carrurta Somaliland. Lana siiyaa Walidka Fursad in ay qaadan karaan dhalashada Dalkan Somaliland kadib marka ay ku qancaan buuxiyaana shuruurdaha looga baahanyahay.

**Qodobka 3aad: Farqadda 4aad:** Waxa uu sheegayaa "Mabaadii'da Xeekani kudhisanyahay shareecada islaamka" Waxaan ku dari lahaa in haddii qoodbada xeerkan amaba shurrucdakale ee dhaqan galka ah iyo kuwaa caalimiga ah ay iska horyimaaddaa in lagu eekaado lana raaco shareecada oo keliya.

**Qodobka 4aad:** Waaxaan ku dari lahaa farqad 3aad oo odhanaysa:

Waalidku (gaar ahaan Aabaha iyo Hooyadu) marnaba ma lumin kario xaqa iyo awooda amar eek u leeyahay ubadkiisa (lab iyo dhaddig) da' kasta oo ay leeyihiin.

**Qodobka 8aad**: Waxaan ku dari lahaa Farqad 3aad iyo 4aad:

1. Waxaaan labaynayaa soo jeedimihii Xildhibaan Faysal iyo Cabdkarim Meecaad ee ahayd in carrurta waddankan joogata aan la mastaafurin Karin, waddan kalena Khasab loogu dhoofin Karin xataa haddii labada waalid ku kala fikrad duwan yihiin.
    a. Haddi ay dhacdo in ay timaaddo wax dacwad ah oo ka dhan ah labada waalid, waalid keliya, ilamaha laftiisa amaba qoyska guud ahaan keliay oo awood u leh in ay ka garnaqaan Maxkamada dalka eek u shuqulka leh.
2. Waalidiinta koriya carruur ayna dhalin, madaxda dugsiyada wax barashada ee heer kasta, hawl wadeenada qoyska iyo carruurta waa in la hubiyaa in u uku sifoobo;

b. Muslim nimo Sax ah
t. Dhaqanka Suuban ee Somalinimo.
j. Akhlaaq wanaagsan.
x. Ku korinayo ilmaha Diinta, dhaqanka iyo akhlaada wanaagsan.

3. Ilmaha lama gayn karo, dugsi waxbarasho (Hoy ah ama Maalinle ah) oo masuul ka (1aad) ka yahay qof aan lahan sifooyinka a, b, t iyo j. farqada labaad ee qodobkan. Ciddii sidaas samaysaana waxa ay denbi ka gashay melena kaga dhacday xuquuqdii aasaasiga ahayd ee xagga diinta, dhaqanka suubanm akhlaaqda wanaagsan, iyo xuquuqda korriimada wanaagsan ee uu xaqa u lahaa, waxaanu dayacay masuulad sharci oo ay tahay waajib in lagula xisaabtamo

**Qodobka 16aad:**

1) Ilma kasta waxa ka masuul ah waalidkii dhalay ama kolba cidda masuuliyaddiisu sis harci ah ugu wareegto.
2) Ilmo Kastaa Waxa uu xaq u leeyahay in la xaqiijiyo nabdoonaantiisa, nafeed, jidheed, caqli, niyadeed iyo lagana dhowro wax kasto oo dhib ku noqon kara ilmaha. Cidkasta oo saba u noqota in ilmaha uu la kulmo dhib ka timid arrimaha farqadani sheegaysana waa in sharciga la horgeeyaa laguna abaal mariyaa falkaas uu gaystay.
3) Xorriyadda Carruurta iyo madax banaanidiisu waa in ay noqoto mid waafaqsan dantiisa shaqsi ahaaneed, waana in ay noqoto mid waalidkiis raalli kaga yahay.
4) Ilmaha waxa masuul buuxa ka ah waalidkiisa amaba cidda sharci ahaan danahisa u maamulaysa.
5) Hay adaha Amnigu hadday qabtaan ilme aan gaadhin da'da 18 waa in ay la xidhiidhaan waalidkii mana dhici karto in ay waraysi ka qaadaan iyada oo aanu walidku amaba qareenkiisa aanu goob jog ahayn
6) Waxa waajib ku ah haydda amni ee ilmahaas soo qabatay in ay u qabato Qareen Bilaash ah. Waalidkana xaq loo siiyo in uu u qaban karo qareen ka duwan ka ay dawladdu u qabatay.
7) Carrurta Laguma xidho karo Xabsiyada Dadka waawayn
8) Carrurta Qol lagulama xidhi karo cid dhib u gaysan karata, haddi ay ka cawdaana ama la ogaado dhib ilmahas lagu hayana, waxa waajib ah in laga wareejiya si loo hubiyo amniga iyo fayo qabka ilmo kasta.

**Qodobka 21aad. Waxaan ku daray Farqad 4aad:**

4. Ilme kastaa oo wadanka Jamhuuriyadda Somaliland Joogaa Waxa uu xaq u leeyahay in uu helo Waxbarsho iyo Caafimaad Bilaasha ah oo ah heer kasta baahiduusu tahay, iyadda oo aan loo eegin, lab dhaddig, degaan, aff, dhalasho iyo wax kasta oo keeni karra takoor amaba dib u dhac gooni ah.

**Qodobka 24aad: Farqadda 1aad,**

Waxaan ku kordhin lahaa in Carrurha Reer miyiga ah iyo Kuwa Qurbaha kasoo laabtay lagu daro, carruraha Baahiyaha Gaarka ah leh si ku habboon duruufahooda gaar ka ee keensan karaan degaamada iyo duruufaha ay ku sugan yihiin, amaba ay wakhti kusugnaayeen taasi oo saamayn gooni ah ku yeelatay.

**Md. Axmed Nuur Guruuje (11min 12sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Gudoomiye, Gudoomiye xigeeno iyo mudanayaasha sharafta leh, waxaan idiinka mahad naqayaa fursadaa aad iisiiseen in aan aan rayi gayga soo bandhigigo, wax badan oo aan odhan lahaa xildhibaanadii iga horeeyay ayaa yidhi, hasayeeshee meelo koob-kooban ayaan taa-taabanayaa .

Qodobka ay soo jeediyeen xildhibaan Cabdikarin iyo Faysal ee ka hadlaaya celinta iyo celin la'aanta caruura dibadahala keeno, dhinac waan ka ayid sanahay, dhinacna waan kaga ra'yi duwanahay, ugu horayn waxaan ayid sanahay in qodobkaa xeerka lagu soo darro, lakiin waxaan odhan lahaa aniga oo in badan maxkammadahay ku arkay waalid isku haysta caruur iyaga oo kala tagay ama midka mid ahi caruurta uu xagan keeno oo yidhaa halkan ayaa lagu haynayaa kii kalana yidhaa waa la celinayaa, tusaale ahaan waxaa jira caruur Dibadaha Caruur nolol wanaagsan ku haysatay in Aabuhu si qasab ah uu halkan u keeno, iyada oo cid daryeeshaa aanay jirrin, hooyadiina timaado si ay halkii ugu celiso labadaa waalid halkaa ku murmaan.

Markaa hadii aynu qasab ka dhigno in aan caruurtii la celin, waxa uu dulmi ku dhici karaa caruur dantoodu ku jirtay in halkaa lagu celiyo, *Sidaa darteed waxaan odhan lahaa caruur dalkan u dhashay hase yeeshee sita dhalasho wadan kale yaanay dhicin in si qasab ah uga daba timaado safaaradi dabadeedna la celiyo. In caruur lala soo baxsaday oo halkan ku dayacani yaanay dhicin, arrintaana aynu u dayno in maxkamada degmadu qiimayso.*

Qodobka kale ee aan doonayo in aan ka hadlaa waa **Qodobka 5aad** ee xeerkan oo sheegaya in xeerkani ku dhisanyahay **Qodobka 10aad farqadiisa 2aad iyo Qodobka 19aad ee Dastuurka,** Waxaan odhan lahaa maadaama oo qodobkaasi yahay, qodobka xeerkan u Aas-aaska ah, halagu darro oo ha loogu horaysiiyo *In xeerkani ku dhisan yahay shareecada Islaamka, maxaa yeelay xeer kasta oo ayny samaysanayno shareecada ayaa ugu mihiinsan Dastuurkuna wuu kabaa.*

Waxaa kale oo aan **Qodobkaa 5aad** ku dari lahaa marka shareecada laga hadlaayo ama arrimahana aynu ka hadlayno waxaa si gooni ah u taabta Baabka Axwaalu shakhsiyaad iyo Xanaanada markaa waa in kuwaana Xeerka lagu muujiyaa, waayo ilamaha waalidka laga wareejinayo ee cid kale loo wareejinayo baabkaa Xanaanada ayaa ka hadla oo waxaa mudnaanta 1aad leh ayaydood, hadii la waayana Habar-Yarta, hadii la waayana Eedad sidaa ayay u sii soconaysaa ee waa in xeerkaa loo raacaa.

**Qodobka 6aad farqadiisa 3aad,** waxaa ay ka hor imanaysaa **Farqada 1aad** ee isla qodobkaa 6aad, maxaa yeelay farqada 1aad ee xeerkani waxay dhigaysaa in dawlada ama Xukuumadu ay uga masuul tahay Ilaalinta Xuquuqda Caruurta, isla farqada 3aadna waxay sheegaysaa in wasaarada qoyska iyo arrimaha Bulshadu ay ka masuul tahay Ilaalinta daryeelka Caruurta, *Sidaa awgeed waxaan soo jeedinayaa in farqadaa loo dhigi in ay Dawlada masuul ugu tahay ilaalinta ququuda caruuta wasaarada qayska iyo arrimaha bulshadu.*

**Qodobka 9aad** waxa uu dhigayaa in hadii uu waalidku dhinto ama xilkiisaba gudan waayo masuuliyada waalid nimadu ay u gudbayso cid kale.

Soo jeedinta guddida shuruucda ee xeerkana lifaaqiisa inoo soo gudbisayna ay u soo dhigeen si caynkaa u dhaw, *waxaan halkaa cadaynayaa in aanay waalid nimadu wareegin ee waxa wareegayaa uu yahay masuuliyada, markaa waa in la yidhaahdaa hadii uu waalidku dhinto ama Xilkiisa uu gudan waayo oo dayacaadi timaado daryeelku waxa uu ku wareegayaa cida ku soo xigta,* maxaa yeelay waalidnimadu waa dhalashada shareecadeenuma ma ogolaha in waalid nimadu wareegto, sida ka jirta wadamada aan islaamka ahayn in waalidnimadu wareegto oo ilmaha aabo iyo hooyo kale loo samayn karo, waxaanan moodaa in xeerkan la soo dheegtay asalkiisii xeerar wadamada sidaa qaba ee yaanay arrintaasi inoo dhuuman ee halagu baraarugsanaado.

*Waxaa kale oo aan ku dari lahaa qodobkaa farqada odhanaysa Sababaha ay masuuliyadu ugu wareegi karto waalidka, waa in la taabtaa, sida in waalidku dhinto, in fiqiirnimo uu ugudan waayo waajibkiisa,* waayo waxa aynu mar walba maqalaa dad dibadaha jooga oo caruurtoodii lagala wareegay, mana aha in taas aynu halkan ku soo darno ee waa in aynu cadaynaa sababaha ilmaha waalidiisa loogala wareegi karro, ee aynaan xukuumad iyo makamada ku sii dayn ee aynu taabanaa.

**Qodobka 33aad ee Xeerka** Asalkiisii uu inoogu yimi waxa uu timaamay Guddi la yidhaa Guddida Daryeelka ilaalinta Caruurta oo ka kooban Agaasimayaal guud oo ay guddida shuruucduna ka dhigtay Xubno wasaaradahaa ka socda, *Anigu waxaa ayidsanahay sida ay guddidu u dhigatay maxaa yeelay agaasimayaasha guud waa kuwo mashquul ah oo aan haleelayn in ay xeerkan daba galaan ama masuuliyada xeerka gaar uga shaqeeyaan.*

*Waxaa kale oo aan soo-jeedin lahaa farqad kale oo adhanaysa ama qodob 34aad laga dhigo waajibaadka guud ee guddidaas, maxaa yeelay waxaa qodobka 34aad lagu sheegay in wasaarada Arrimaya bulshada iyo qoysku ay soo saarayso Xeer-nidaamiye hawlgalinta guddida ah,*

*hasayeeshee xeer-nidaamiyaha waxaa ka horeeya waajibaad Guud ee guddida oo xeerkan lagu darro oo ah 1,2iyo 3 iyo sababaha guddidan loo aas-aasayo, waayo hadii xeerkanu uu aas-aasay guddidaa uunu  tilmaamay waajibaadkeedii waa la mid oo wasaaraduna dhinaca ay doonto ayay ula kici doontaa ee waa in la timaamaa waajibaadka guddidaas.*

Waxaa kale oo aan soo jeedinayaa; *Marka Xeer la samaynayo sidiisaba waxaa jira ma'baadii guud oo caalami ah, waxaana ka mid ah in xeerku yeesho xeer-ciqaabeed marka laga bilaabo quraan keena, axaadiista iyo xeerarka kale ee wadciga ah oo dhamaantood ay ku jirto xeer-ciqaabeed, markaa xeerka aynu haynaa waxa xeer-ciqaabeed ah timaami maayo, tusaale ahaan hadii la dayaco masuuliyada maxaa ka dhalanaya? Waxaan soo jeedinayaa in xeerkan lagu darro qodobo ka hadlaaya ciqaab waajib gudashadaa ka dhalata.*

Waxaa kale oo ka mid ah mabaadiida guud ee laga rabbo in xeerkastaa uu badbaadiyo qodobo kale oo ku jira Xeer kale. Waayo xeer kasta oo inga soo baxa hadii aynu xaga danbe ka darno waxa uu laalayaa xeerarka kale, xeer inoo jirayaa ma jirro, markaa waa in la yidhaa xeerkani waxa uu la shaqaynaa xeer hebel qodobadiisaa oo aynaan xeerasha wada laalin.

Waxaa kale oo jirta in xeer-walba uu la dabeecad yahay xeerar kale, sidaa awgeed waxaa halkan ka muuqata in aan xeerkan lala soo akhriyin xeerka ay bah-wadaagta yihiin ee la yidhaahdo Xeerka Garsoorka Caruuta oo tilmaamaaya sida caruurta markhaati loogu qaadaayo, halka lagu xidhaayo, maxkamada xukumaysa, halka lagu xidhaayo, waayo in caruurta xabsiyada waaweyn lagu xidhaana nidaam maaha. *Markaa waxaan odhan lahaa si aynu arrimahaa uga taxadarno qodobadaana loogu soo darro laba saddex casho xeerkan dib guddidii ha oogu celiyo si xeerarkaa loola soo akhriyo looguna soo darro.* Waanad mahadsantihiin. Wsc.

**Md. Jimcaale Axmed Yoonis** **(6min 24sec):-**Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Alxadulailah, Wa bihii nastaciinu amuuru Dunyaa wa Diin, Alaahuma Sali Calaa Muxamed, Wacalaa Aalii, Wa Saxbihii Wasalam. Allaahuma

Shir-guddoobka, Mudanayaasha, Shaqaale weynaha Golaha, Garyaqaanada iyo Saxaafada waxaan idinku salaamayaa, salaanta Islaamka. Asalaamu Calaykum Warax Matulaahi Wa Barakaatu.

Qodobada aan doonayey in aan ka hadlo oo qaarkood u badnaayeen soo jeedin, waxa ka dhawaajiyey xildhibaanadii iga horeeyey. Laba qodob oo kuwii ugu muhiimsanaa oo aan halkan ku hayey waxa carrabka ku dhuftay saaxiibkay Xildhibaan Guruuje, Qodobkaas oo ahaa carruurta dibedda laga keeno iyo celintooda iyo **Qodobka 9aad** oo sheegayey Masuuliyada waalidiinta oo runtii aan aad u adkaynayo masuuliya ugu weyn ee waalidka.

Xeerka waxa ka muuqata soo jeedintii Guddida oo ay yidhaahdeen Xeerka Xuquuqda carruurta oo muhiim ah, anigu waxaan qabaa fikir ahaan in erey-bixinta saxda ah lagu

daayo "Xeerka **daryeelka iyo Ilaalinta Xuquuqda carruurta**" in sidaas loo daayo ayaan soo jeedinayaa, maadaam oo marka laga hadlayo daryeelka iyo ilaalinta uu horeeyo Daryeelku.

Haddii daryeel la helo ayaa la ilaalin karaa xuquuqda carruurta, markaa waxaan soo jeedinayaa in lagu daayo "**Xeerka Daryeelka iyo Ilaalinta Xuquuqda Carruurta".**

Iyadda oo **Qodobka 5aad** xeerkani uu sheegayo inuu waafaqsan yahay Dastuurka Qodobadiisa 10aad farqadiisa 2aad iyo Qodobka 19aad oo ka hadlaya daryeelka iyo Xuquuqda. Markaa maadaama Qodobka 5aad ee xeerkani sidaas dhigayo, waxaan odhan lahaa soo jeedinta Guddida sidaa kuma waafaqasani. Waxaan soo jeedinayaa in xeerka lagu daayo sida Dastuurku sheegayo oo lagu daayo "**Xeerka Daryeelka iyo Ilaalinta Xuquuqda Carruurta".** Sidaas ayaan soo jeedin lahaa, waxaana meesha ka baxaysa dayeelkii, waxayny ilaalinaynaa waxa **weeye xusuuqdii** carruurta oo meesha ka baxaysa.

Haddii la yidhaa xaquuqda, waxa meesha ka baxaysa daryeelka carruurta oo waafaqasan **Dastuurka Qodabada 10aad iyo 19aad,** waxaan soo jeeninayaa in xeerkan loo daayo **magaca "Xeerka Daryeelka iyo Ilaalinta Xuquuqda Carruurta".**

**Erey-bixinta** marka laga hadlayo tacadiga ku salaysan jinsiga, waxa erey-bixinta ku jira ereyo badan oo xitaa af-soomaali ahaan aan lagu dhaqaaqi karrin oo tacadiyadu ay ka mid tahay**, markaa waxaan soo jeedinayaa in ereyadaas la beddelo oo erey af-soomaaligeena ku munaasib ah lagu beddelo.**

**Ereyada** kale ee ku jira tacadiga jinsiga waxa ka mid ah, Xad-gudbka ninku u gayso xaaskiisa, markaa xad-gudubkaasi waa xad-gudub noocee ah**. Waxay ahayd in la yidhaa xad-gudub kasta oo ka dhan ah shareecada islmaaka oo ninku xaaskiisa u gaysto, in la yidhaa ayaan soo jeedinayaa.**

Waxa kale oo ku jira **warbaahinta waxyeelada leh,** xagga erey-bixin markaynu ka hadlayno khaladaad badan ayaan ku jira runtii. Marka laga hadlayo erey-binta waxyeelo waa erey culus, **waxaan ka haboon oo aan soo jeedinayaa in la yidhaa warbaahinta saameynta leh**.

Warbaahinta saameynta leh marka laga hadlayo, waxaad moodaa Electronic ah oo waxyeelo ku ah maaha, markaa waxa xagga hore la soo dhigay bad-qabkiisa iyo caafimaadkiisa, waxa ka horaynaysa akhlaaqda ilmaha. Markaa in la soo horaysiiyo warbaahin kasta oo waxyeelo ku leh dhanka akhlaaqdiisa jiritaan ahaan u leh, markaasaa caafimaadkiisa iyo bad-qabkiisa.

Waxa aad moodaa inuu xeerkani ka durkay in lagu xuso akhlaaqda**, maadaama oo aynu waxa aynu ka hadlaynaa ay tahay ubad yar yar in mar kasta lagu xuso baraarinta iyo akhlaaqda ubadka yar-yar ayaan soo jeedinayaa.**

**Qodobka 18aad oo ka hadlaya "Xaqa Islaamnimo"** af-soomaaliga ah la saxo oo ha laga dhigo **"Xaqa Islaamnimada".** Marka laga hadlayo xaqa Islaamnimada ee carruurta ay siisaynnaad ayey u badan tahay, wax aynu soo koobi karnana maaha, laakiin halkaas waxa ku jira laba farqadood, waxaan soo jeedin lahaa oo aan ku dari lahaa **farqada 3aad** oo ah **"Ilmo kastaa waxa uu xaq u leeyahay inuu dhaxlo labadiisa waalid"** waayo dhaxalku waa xaq uu ilmaha yar uu Islaamku siiyey. **Aayad qur'aan ah ayaa sheegaysa, markaa waa xaq islaamnimo in Ilmaha yari uu dhaxlo labadiisa waalid, waxaan soo jeedinayaa in farqadaa 3aad lagu daro.**

Waxaan u imanayaa **farqadaha 29aad iyo 30aad.** Labadan farqadood waxaad moodaa inay macno isku mid ah xambaarsan yihiin, markaa la akhriyo. **farqada 29aad** waxay odhanaysaa "xaqa in laga ilaaliyo jidh dil, hab-dhaqanka bani-aadanimada ku xun ama sharaf dilka" **farqada 30aad** waxay odhanaysaa "xaqa in laga ilaaliyo xad-gudubka" markaa macno ahaan labadaas farqadood waxaad moodaa in inay isku mid yihiin.

**Waxaan soo jeedinayaa in labadaas farqadood ee 29aad iyo 30aad la isku raro oo mid qudha laga dhigo.**

**Waxaan odhan lahaa ha laga dhigo "xaqa in laga ilaaliyo dhammaan noocyada xad-gudubyada**" maadaama oo af-soomaaligoodu aad isugu dhaw yahay.

**Qodobka 29aad** ka dhigno, waxa noqonaysaa in la soo raaciyo **farqada** uu wato **Qodobka 30aad** farqada oo odhanaysa **"Ilma kastaa wuxuu xaq ugu leeyahay waalidkii, dawladda, ilaaliyaha, daryeel bixiyaha, macallimiinta, booliiska ama cid kasta oo kale oo mas'uul ka ah ilaalinta ilmaha inay ka ilaaliyaan dhamaan falalka u dhigma xad gudub jidheed iyo waxyeelo dareen** " waxaan soo jeedinayaa in labadaas qodob la iksu raro farqadaas la raaciyo Qodobka 29aad maadaama oo labadaas Qodob ay aad isugu dhaw yihiin.

Waxa kale oo aan soo jeedin lahaa **Qodobka 33** marka laga hadlayo Guddida Xeerka Daryeelka iyo xuquuqda carruurta maadaama ay Guddidu badan tahay ayna soo jeediyeen in Golaha Wakiilada iyo Guurtida laba xubnood ha laga darro.

Waxaan soo jeedin lahaa in laga dhigo 4xubnood oo ka kala socda 2 guurtida iyo 2 wakiilada ah, haddii la waayo xubin Golaha Wakiilada ah waa in xubinta kale la helaa, sidaas si la mid ahna waa in Golaha Guurtida 2 xubnood ka socdaan. Maadaama oo ay fulintuba badan tahay.

Waxaan u mahadcelinayaa Shir-guddoonka iyo Munayaasha. Waxa kale oo aan ku raacsanahay soo jeedintii Guddoomiyaha ee ahayd in la isku daayo Guddoomiyaha iyo Mudanaha hadlaya oo aan la dhexgelin.

**Md. Jaamac Abakor Cismaan** **(3min 00sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Alxadulailah, Wa bihii nastaciinu

Shir-guddoobka, Mudanayaasha, Shaqaale weynaha Golaha iyo Saxaafada waxaan idinku salaamayaa, salaanta Islaamka. Asalaamu Calaykum Warax Matulaahi Wa Barakaatu.

Waxaan taageerayaa oo aan second garaynayaa Qodobka carruurta qurbaha siday soo jeediyeen Xildhibaanada Faysal, cabdikariim iyo Mubaarig.

Carruurta qurbaha laga soo celiyo sababta akhlaaqda iyo amniga waxa dhacday in aan waalidka iyo Somaliland waxba laga waydiin oo la iska celiyo oo dibada lagu celin jiray, markaa waxaan soo jeedin lahaa in arrinkaa si mug leh loo eego, waayo xeer aynu u samaynaa ma xalinalyo, laakiin waxaynu u baahan nahay in aynu wadda hadal ka galno oo la qaabeeyo. Siduu xildhibaan mubaarig sheegay waxa jira carruur la isku haysto iyo kuwa aan la iksu haysan, laakiin in aynu xeer samaynayaa oo inaga xeer leh arrintaas ka hadalnaa aad ayey muhiim u tahay.

Qodobka xuquuqda carruurta oo aan is leeyahay Qodobada ugu muhiimsan waxa ka mid ah carruurta la kufsado. Carruurta la kufsado waxaan odhan lahaa yaan loo marrin hab-dhaqan ha la ciqaabo, waayo qofka ilmo yar kufsadaa uma qalmo in la yidhaa waxa lagu dhamaynayaa hab-dhaqan oo inta odayaal isku yimaadaan islmaha xuquuqdiisii lagu gafo.

Markaa waxay u baahan tahay in arrintaas xeer ciqaabeed laga sameeyo oo aan odayaasha lagu deyn taasna intaas ayaan odhanayaa.

Haddii la is yidhaa wax kasta xeer ku xalila way adkaaanaysaa, waxaan soo jeedinayaa waa wixii shareecada ah shareecada loo daayo oo shareecada soo horaysee iyadda loo raaco.

**Md Mubraarig Maxamed Xuseen (Xeel-dheere)** **(10min 05sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Alxadulailah, Wa bihii nastaciinu amuuru dunyaa wa diin.

Shir-guddoobka, Mudanayaasha, Shaqaale weynaha Golaha iyo Saxaafada waxaan idinku salaamayaa, salaanta Islaamka. Asalaamu Calaykum Warax Matulaahi Wa Barakaatu.

Waxaan ka hadlayaa **Qodobka 1aad erey-bixinta** ee qabyo qoraalka xeerkan ereyo aan ku qornayn xeerka gudahiisa oo ka maqan sida ku xad-gudub dareen, Guur qasab ah iyo kuwa la mid ah;

Waxa kale oo aan erey-bixinta ku qornayn tafsiirkoodi Daryeele Caafimaad oo sheegaya in loola jeedo "Qof kasta oo waalid ah oo ilaaliya oo si wanaagsan u daryeela si joogta ah ama si ku meelgaadh ah/iyadda oo ay isu keentay xidhiidh dadban ama xidhiidh aan dadbanayn. Haddaba waxa ay tahay xidhiidhka dadbani waxa uu yahay ama xidhiidhka aan dadbanayn waxa uu yahay.

Erey-bixinta waxa kale oo ku jira …. oo aan caddayn waxa uu yahay, waa in la qeexaa ereyga qaan-gaadh.

**Qodobka 2aad Magaca Xeerka.** Waxaan Guddida Caddaalada ku raacsanahay Magac ay soo jeediyeen oo ah **Xeerka Xuquuqda carruurta**, waayo markii hore ilaalinta ayuu ahaa oo dhinac (protection) ayuu wax ka sheegayey. Waxa ka maqnaa wixii la odhan jiray daryeelkii iyo xannaanaytii. Markaa xeerka sidaas ha loo daayo.

**Qodobka 4aad Xayndaabka Dabbaqaadda Xeerka.** Xeerkan waxaa lagu dabbaqayaa carruurta ku dhaqan dalka Jamhuuriyadda Somaliland, **Waxaan qodobkan ku raacsanahay soo jeedintii Guddida**.

Waxa kale oo aan soo jeedinayaa **farqada 2aad** ee Guddidu soo jeedisay in da'da carruurta laga dhigo 18 sanno, iyaddoo laga eegayo dhiunac dhawrida iyo ilaalinta xuquuqda carruurta. Waayo waddamo badan oo adduunka ka mid ah oo muslim ah oo ay ka mid tahay waddanka Masar ayaa sidan oo kale xeerarkooda ugu daray xuquuqda carruurta.

Waxa kale oo aan soo jeedinayaa in 15 ilme loo aqoonsado, iyadda oo 18 jirna wixii ka yar loo aqoonsado qaan-gaadhka. Sida uu jidaynayo xeerka Nidaamka Garsoorka Xeer Lr. 36/2007.

**Qodobka 8aad Xaqa Caddaynta Waalidnimida.** Waxaan soo jeedinayaa Qodobkan 8aad farqada 1aad xarafka (B) in loo daayo siduu qabyo qoraalka xeerku ku yimid oo aan la raacin soo jeedinta Guddida.

**Qodobka 15aad Xaqa in Laga Ilaaliyo Dayacaadda.** Mudane Guddoomiye Qodobka 15aad farqada 2aad. Waxaan soo jeedinayaa in xeerka lagu caddeeyo sababta iyo saamaynta dayacaada ilmaha, iyadda oo aan loo xilsaarin cid kale, waana in la caddeeyaa sababtaas oo aan wasaarada loo deyn sida ay soo jeedisay Guddidu.

**Qodobka 16aad Xaqa Xorriyadda Iyo Amniga Ilmaha.** Waxaan soo jeedniayaan in Qodobka 16aad agu darro **farqada 3aad** oo odhanaysa **"Dawlada ayaa ka masuul ilaalinta iyo xoriyada amniga guud ee ilmaha, sida ku cad Dastuurka JSL".**

**Qodobka 17aad farqada 2aad** Ma caddaynayo nidaamka loo raacayo diwaangelinta dhalashada ilmaha ma Xeerka Jinyadaha mise waa xeerka garsoorka, halkaas waa in la caddeeyaa xeerka la raacayo ee ay soo jeediyeen. Si meesha looga saaro mad-madawga ku jira soo jeedinta Guddida ee farqada 3aad xarafka B) Da'da ilmaha waxa lagu caddeynayaa ama xaqiijinayaa da'da dhalashada ee gaadhka muwaadinka iyo document kale oo rasmi ah.

T) haddii aanay jirin documenti rasmi ah, waxa caddeynaya Guddi ay soo magacaabaan Wasaarada Diibta iyo Awqaafta oo kaashanaya wasaarada Arrimaha Bulshada iyo Wasaarada caafimaadka.

Waxaan soo jeedinayaa in Qodobka 17aad lagu darro farqada sheegaysa **"iilmaha wuxuu xaq leeyahaya inuu helo gaadhka muwaadinimada Somaliland, sida waafaqsan Dastuurka iyo Xeerka Jinsiyada"**

**Qodobka 20aad** Xaqa Magaca, Dhalashada Iyo Aqoonsiga. Waxaan soo jeedinayaa in Qodbka 20aad farqadiisa 1aad lagu ladho farqada 2aad ee Qodobka 18aad si uu macno buuxa uu u yeesho.

Qodobka 21aad xaqa waxbarshada waxaan soo jeedin lahaa in farqadiisa 1aad laga dhigo sidan soo socota **"Ilme kasta waxa uu xaq u leeyahay inuu helo waxbarsho diimeed oo diinta islamka ah iyo mid maadi oo bilaash ah"**

Waxa kale oo aan soo jeedinayaa in isla **Qodobkan 21aad** lagu darro farqad 4aad oo odhanaysa **"in ilme kasta oo naafo ahi uu xaq u leeyahay waxbarasho bilaash ah oo la jaanqaadaysa xaaladiisa gaar ahaaneed**".

**Qodobka 23aad** Xaqa Daryeel Waalidnimo. Farqada 2aad ee qabyo qoraalka xeerkani waxay xiganaysaa farqada aan ku jirin Qodobka 9aad. Waxaan soo jeedinayaa in la xigto farqada 1aad ee Qodobka 9aad, isagoo Qodobka 9aad lahayn farqad 2aad iyo 3aad, waxaanan soo jeedinayaa iun farqadaas 3aad meesha laga saaro.

**Qodobka 28aad** Xaqa Adeegyada Caafimaad. **Waxaan soo jeedniayaa in Qodobka 28aad lagu darro farqad 4aad oo sheegaysa "In dawladu ay damaanad qaado adeegyada caafimaad ee ilmaha aan haysan qarashka ku baxaya caafimaadkiisa**"

Qodobka 33aad Guddida Xidhiidhka iyo Xog Iswaydaarsiga Ilaalinta Xuquuqda Aadamaha ayaa loo bixiyey, waxaan soo jeedinayaa in Guddidani noqoto Koomiishan Madax-bannaan ama Guddi madax-bannaan oo Madaxweynuhu soo magacaabo, Golaha Wakiiladuna ansixiyo, magaceedana loo daayo "Ilaalinta **Xuquuqda carruurta,** lagana saaro **xidhiidhka iyo xog waraysiga** laga horeysiiyey". Maadaama oo ay la xisaabtamayaan Hay'adaha iyo Wasaaradaha ka shaqeeya xuquuqda carruurta.

Mudanayaal gabi ahaanba ma jirto wax ciqaab ah cidda ku gafta ama jabisa xeerarka ama Qodobo ka mid ah xeerkan xuquuqda carruurta, marka laga yimaado in loo cuskado xeerkaciqaabta guud oo aan la jaanqaadayn xeerka xuquuqda carruurta.

Waxaan soo jeedinayaa in xeerkan lagu darro ciqaabta uu yeelano ee xeerkan ku waajibaysa ciddi jabisa ama ku xad-gudubta Qodobo ka mid ah xeerkan ama ku xad-gudubta xuquuqda carruurta, maadaama aanu xeerka ciqaabta guud aanu la jaanqaadayn xeerka xuquuqda carruurta oo uu yahay mid xukinkiisu furan yahay oo aan dhawrnayn xuquuqda iyo sharafta islmaha.

Sidaa darteed, waa in la sameeyo xeer ciqaabeed u gaar ah gabood falada loo gaysto carruurta loona sameeyo maxkmado lagu qaado xukunkooda.

Waxaan soo jeeinayaa in xeerkan loo gudbiyo Guddida Arraimaha Diinta, dhaqanka iyo qoyska oo aan xeerkan la soo marin oo aan soo lafagurin soona eegin, isla markaana lagu celiyo Guddida xeerkan gacanta ku haysay.

**Md. Mubaarik Muuse Ismaaciil** **(16min 14sec): -** Aad ayaan idiin salaamayaa, *ugu horayn waxaan halka ku raaci lahaa labadii Xildhibaan ee iga horeeyay Ee kala ahaa Xildhibaan Cabdikarin Iyo Xildhibaan Faysal oo ka hadlay Caruurta u dhashay wadankan Somaliland sitana jinsiyado kale in wadanka laga saarin*, waan ku taageersanahay maadaamo oo caruurtaasi yihiin dad Somaliland u dhashay.

Dhanka kale arrinta uu ka hadlay xildhibaan Guruuje ee uu jidhi "marka ciyaalka ay waalidiintu isku haystaan oo labada waalid mid ka mid ahi uu yidhaa ciyaalka waxaan gaynayaa meeshii u dan ah" hadii aynu eegno xeerarka aduunka u yaala ama wadamada muslinka ahba u yaala, hadii ilmaha wadankaa labada waalid ka soo jeedaan wadankaasina wadankiisii hooyo yahay ilmaha yar waxaa loo tixgaliyaa loona raacaa Xuquuqdiisa wadankaas ilmahaasna wadankaas lagama saari karo, markaa labadii mudane ee hore ayaan ku raacsanahay soo jeedintaas.

*Sidoo kale waxaan ku raacsanahay Xildhibaan Jimcaale Magaca Xeerkan in uu Noqdo Xeerka Xuquuqda Carruurta oo aanu noqon magicii dheeraa ee hore oo ahaa magac aan ku haboonayn.*

**Qodobka 7aad** ee ka hadlaya Masuuliyada Tooska ah **farqadiisa 2aad** oo u dhigan sidan; Waalidka ilmuhu wuxuu mas'uuliyaddiisa u gudanayaa si waafaqsan Shareecada Islaamka, dastuurka iyo heshiisyada caalamiga ah ee ka hor imanayn diinta islaamka, *Waxaan soo jeedin lahaa maadaama oo ay shareecada Islaamku si wanaagsan u qeexday Masuuliyada waalid nimada dad muslin ah kuna dhaqma diinta islaamka aynu nahay, waxaana jira heshiisyo caalami ah oo farabadan oo aan ka horimanayn diinta Islaamka, sidoo kale bay'ada sharcigayaa laga sameeyay iyo ta aynu ku nool nahay oo kala duwan awgeed waa in laga saaraa* ***HESHIISYADA CAALAMIGA AH*** *loona daayo shareecada islaamka ah iyo wixii waafaqsan Dastuurkeena.*

**Qodobka 11aad ee ka hadlaya Xaqa Ixtiraamka;** Qodobkan waxaad moodaa in la soo Turjumay waxaanu ka hadlayaa in xeerkan lagu dabaqayo dacwada Idaariga ah iyo kuwa garsoorka aragtida ah iyo in la tixgaliyo aragtida ilmaha iyada oo la eegayo da'diisa qaan-gaadhnimadiisa, *markaa waxaa muuqata in xeerkani yahay mid la soo turjumay rabitaanka ilmaha waxaa ka muhiimsan ka waalidka soo koriyay kuna soo tabcay waxaanan soo jeedinlahaa in Qodobkaa 11aad laga saaro Xeerka*

**Qodobka 13aad** oo ka hadlaya Xuquuda Aas-aasiga ah ee Caruuta, *waxaan soo jeedinayaa in xuquuqda Caruurta uu xeerku u qeexi si toosan, sida waxbarashada iyo Caafimaadka oo uu xeerku yidhaa labadaa xuquuqoodba ilmaha yari waa in uu ku helaa si bilaasha ama lacag la'aan ah* Sida wadamada horumaray.

**Qodobka 14aad Xaqa Nolosha, Badbaadada Iyo Horumarka Farqadiisa 2aad** oo ka hadlaysa Ilaalinta nolosha ilmuhu waa inay noqotaa waajibka kowaad ee saaran qof kasta oo ay ku waajibtay mas'uuliyadda gaarka ah, hay'ad kasta oo leh mas'uuliyadda guud ee la xidhiidha ilaalinta xuquuqda carruurta. *Xeerkan iyo Dastuurkuba wuu Qeexayaa masuuliyada Gaarka ah cida leh waana waalidka markaa waxaan soo jeedin lahaa in laga saaro kalmada ah **WAAJIBKA KOWAAD EE SAARAN QOF KASTA** in laga saaro laguna Qoro **WAALID** waayo masuuliyadu waxay gaar u saaran tahay waalidka.*

**Farqadiisa 3aad** ee ka hadlaysa Xaqa ilmaha ee badbaadada iyo horumarka oo ah fayo qabka (well-being) iyo horumarka jidheed, maskaxeed iyo nafsi, dareen, iyo bulsho ee ilmaha, waa in loo ilaaliyaa xadka ugu badan ee suurtagalka ah. *Waxaad moodaa in farqadan lafteeda la soo turjumay, runtii waa in si wanaagsan loo qeexaa lana yidhaa* Waa in loo ilaaliyaa sida **UGU BADAN UGUNA SUUTO GALYSAN WAAFAQSANA DIISNTA ISLAAMK, WAALIDKANA KU WAAJIB AH**.

Sidoo kale Xeerku ma sheegin ama muu kala saarin yaa caruur ah yaa qaan gaadh ah iyada oo aynu ognahay in ilamaha yar ee aan qaan gaadhin uu ku hoosnoolyahay waalidkii *Waxaanan soo-jeedin lahaa in arrintaa qaan gaadhka ah ay dib Guddidu uga fiirsato oo la kordhiyo da'da qaangaadhka waayo inaga ilmaha 15jirka ahi waa ilmo yar oo waalidkii ku xidhan daryeelkiisa, markaa waa in aan la moodin in ilmaha yar uu xeerku siinayo xoriyad farabadan oo aynu si wanaasan u qeexno.*

**Qodobka 14aad Xaqa in Laga Ilaaliyo Dayacaadda farqada 1aad oo ka hadlaysa** Ilme kastaa wuxuu xaq u leeyahay in aan la dayicin dhammaan qaybaha kala duwan noloshiisa sida daryeel waalidnimo, koriinka jidh ahaaneed, maskax ahaaneed, daryeelka caafimaadkiisa, waxbarashadiisa, iyo xuquuqaha kale ee xeerku jideeyay iyo sifo kasta oo u muuqda in ay dan u tahay ilmaha oo aan ka hor imanayn xeerka. *Waxaan soo jeedinayaa in xaga danbe laga raaciyo iyo **SHAREECADA ISLAAMKA.***

**Farqada 2aad ee isla Qodobkaa 14aad;** Sababaha iyo saamaynta dayacaadda waa inay qiimeeyaan hawl-wadeennada u xil-saaran ilaalinta iyo daryeelka Carruurta ee Wasaaradda Shaqo-galinta, Arimaha Bulshada iyo Qoyska ***waxaans oo jeedinayaa in laga saaro Erayga QIIMAYNTA.***

**Qodobka 18aad farqadiisa 1aad, waa** in lafteeda la isla eegaa oo la sheegaa intee ayuu qofku ku qaan gaadhayaa oo hadii da' la qorayana la sheegaa.

**Qodobka 21aad farqada 1aad** Ilme kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu helo waxbarashodiimeed iyo mid maaddi ahba oo aa-aasi ah, *waxaan soo jeedin lahaa in lagu Darro **OO BILAASH AH**.*

*Waxaa kale oo aan soo jeedinlahaa in farqad 4aad lagu darro, in wasaarada waxabarashau ay ka masuul tahay fidinta waxbarashada Caruurta.*

**Qodobka 22aad farqadiisa 2aad una qdhigan in** Ilme kastaa wuxuu xaq u leeyahay in aan lagu faquuqin abuurka u gaarka ah, dabeecaddiisa, lab, dheddig, qabiilkiisa iyo xaaladdiisa nololeed, *waxaan soo jeedin lahaa in laga horaysiiyo halka ay ku qoroantahay abuurkiisa, gaarka ah, in lagu baddelo BAAHIYAHA GAARKA AH.*

**Qodobka 28aad ee Xaqa Adeegyada Caafimaad farqadiisa 1aad una qoran** Ilme kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu helo adeeg caafimaad marka ay la soo gudboonaato xaalad caafimaad oo u muuqan karta mid aan daawo lahayn, *waxaan soo jeedinayaa in aan la odhan marka ay la soo daristo xaaladi ee waa in la yidhaa waa in uu helaa markasta caafimaad bilaash ah.*

**Farqada 4aad ee isla qodobkaa 28aad** Ilme kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu helo talaallada lagaga hortago xanuunnada faafa *waxaan soo jeedinayaa in xaga danbe laga raaciyo oo BILAASH ah. Asc.*

**Md. Sh. Siciid Maxamed Ismaaciil (Siciid-sokeeye) (6min 33sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Alxamdulilaah ilaahay ayaa mahad leh, halkan iskugu keen keenay, ugu horayn waxaan u mahad celinayaa Guddidii ku soo dhabar jabtay lafa gurka Xeerkan iyo dhamaan xildhibaanadii ka hadlayba.

*Ugu horayn waxaan taageerayaa qodobkii ahaa caruurta la celinayo, ee xildhibaanadii iga horeeyay sheegeen waxaanan ku talinayaa in ubadkaa loogu taliyo sidii loogu badbaadin lahaa caqiidadooda iyo diintooda.*

Qodobka kale ee aan doonayo in aan taabto waa qodobka wax barashada *waxaanan ku raacsanahay intii tidha wax-barashada Aas-aasiga ahi waa in ay qasan noqotaa oo ilmo waliba uu helaa wax-barasho bilaash ah si umadeenu ay uga baxdo jahliga oo aynu ugu baxno iftiinka nolosha.*

Waxaa kale oo aan soo jeedinayaa waxaa jirra ubaddo aan jaanis u helin xiligii ay wax baran lahaayeen sida 6jirka oo kale oo duruufo ay u saamixi weyday, sida uu ka

dhawaajiyay Mudane timo jilic, *waxaan seconment leeyahay in ubaddkaa aan helin wax-barasha Aasaasiga ah in loo sameeyo Vocational training ama meelo ay ku bartaan farsamada gacanta si aynu u helo skilled labor farrobadan oo noloshooda iyo dadkoodaba ku anfaca.*

Shareecada Islaamku waxay u jeexday barbaarinta iyo korinta ubadka line aad iyo aad qani u ah, inaga haqantiraya wax kasta oo u suuro galinaya ubaddkeena in aynu ku korrino kal-gacal, wanaag iyo raxmada oo aynaan u baahanayn meel aynu wax uga doono meel kalana ayaynaan wax ka qaadan, oo inga wax la inaga qaato.

Waxa uu nabigeenu N. N. K. H. A. inagula dardaarmay in aynu ubaddkeena ku boorino in ay tukadaan Salaada oo ilmuhu marka uu todoba jir gaadho u ka xayno masaajidka si uu ugu barbaaro salaada marka uu 11jir gaadhan aynu ku karbaashno hadii uu u tukan waayo.

Waxaa kale oo aan soo jeedin lahaa in xeerka lagu qeexo qaan-gaadhnimadu waa intee laga yidhaa waa da'da intaa leeg wixii intaa ka hooseeyaana ay ku qeexnaato, waayo wadamada islaamka qaarkood ayaa waxay qaateen da'da qaan gaadhnimadu waa 16jir qaar ayaa qaata 18jir *waxaan soojeedin lahaa in la qaato 18jirka.*

**Qodobka 28aad ee Caafimaadka;** Sida aynu maanta ka warqabno maanta wadankeenu caafimaadku waa lacag oo caafimaad bilaash ahi majiro oo tusaale ahaan hadii maanta qof miskiin ah oo aan waxba haysan aan loo heli karin xabad xumad jabin ah, *Sidaa daraadeed waxaan ku dardaarmi lahaa in caafmaadka iyo waxbarashada ubadka yar-yar ay ku noqoto bilaash Khasab ah intaas ayaan ku soo koobayaa Asc.*

Gudoomiye Cabdirisaaq; mudanayaal waxaa doonayaa in aan baraarujiyo dhawr Qodob mudanayaashii is-qoray qaar ayaa waxay codsadeen in ay Barri subax Dooda galaan, qaarna wakhtigii salaada ayay gaadhay mudanayaasha oo tiradoodu dhantahay 9-mudane waxaana siin doonaa barri hadii Alle idmo.

Sidoo kale waxaan baraarujinayaa inbadana waan ku cel-celiyaaye waxyaaba aynu si guud u shaagayno ee aynu odhanayno waxay ahayd, cida laga rabaa waa innaga ama waa Golaha, waxaana wanaagsan in qof waliba soo diyaar garoo oo uu qodobo sheego oo uu yidhaa qodobkaa iyo qodobkaa wax halaga beddelo, lana taageero, oo tusaale ahaan hadii aad tidhaa hebelbaa yidhi noqon mayso in aad taageertay, markaa waa in qodobka aad ku taageerto si uu u soo galo hadal qoraalka oo inamadu u soo galinyaan.

Markaa barrito ma wixii cuquubaad ah ma waxaynu isla qaadanaynaa oo lala akhriyayaa xeekaa kale ee ciqaabta guud mise wax cusub ayaa lagu darayaa cidii ku xad-gudubta waana in ay inoo cadaataa taasi hadii alle yidhaa.

Mudanayaal barri hadii alle idmo waxaa inoo sii socon doonta hadii aynu wakhti dheeraad ah hellana waxaynu gali doonaa cod-of conduct-iga hadii uu inoo soo dhamaado weynanu qaybin doonaa, waxaanan codsanayaa in mudanayaashu wakhtiga aad u ilaalinyaa iyada oo ay jiraan mudanayaal badan oo fasax ahi waxaan marlabaad

codsanayaa in qof waliba uu soo dedaalo oo uu wakhti hore yimaado si aynu 9ka u furano oo aynu laqabsano oo saddexdaa saacadood loola qabsado oo aan loogu caajisin oo ilaa 12:30 ama 12:15 u cidno fadhiga aad iyo aad ayaad u mahadsantihiin fadhiguna wuu inoo xidhan yahay.

## *Golihii 5aad ee Wakiillada, Kal-fadhigii 2aad fadhigii 21aad*

***Wakhtiga uu Furma:-*** 09:30AM
***Taariikhda:- Axad 30 January 2022***

**Gudoonka: -** Mudane, Cabdirisaaq Khaliid Axmed

**Quraanka: -** Md. Sh. Siciid Sokeeye.

**Ajandaha Fadhiga:-**

- **Doodda Xeerka Ilaalinta Xuquuda Caruurta Maalinta 2aad**

**Md. Axmed Maxamed Maxamuud (Kaare)** **(5min 40sec):-** **Qodobka 1aad ee** Magaca xeerka waa in loo badelaa sidan **"Xeerka Ilaalinta Xuquuqaadka ama Xuquuqaha Caruurta",** sababtoo ah xuquuqahoodu way badanyihiin sidaas daraadeed waa in laga dhigaa Jamac.

**Qodobka 3aad** Waxaan soo jeedin lahaa in ciwaanka Oo u dhigan sidan, **Ujeedooyinka Xeeka** in lagu daro Qodob Cusub oo ah **Mabaadiida guud ee xeerkan** maadama oo ay

xambaarsantahay macno kale oo gaar ah oo ka duwan **ujeedooyinka**, Isla markaa loo dhigo Ciwaanka qodobkaas Cusub sidan:

**Mabaadida Guud iyo Fasiraadda Xeerka, farqadaha Cusub ee lagud darayaana waxay noqonayaan sidan: -**

1. Xeerkani waxaa saldhig u ah shareecadda islaamka si waafaqsan Qodobka 5aad, faraqdiisa 2aad iyo 128aad, faqradiisa 1aad ee Dastuurka JSL.

2. Xeerkan waxaa loo fasirayaa si waafaqsan Xeerarka Caalamiga ah ee Qaramadda Midoobey inta aysan ka hor imanayn Shareecadda islaamka si waafaqsan Qodobka 21aad, faqradiisa 2aad iyo Qodobka 10aad, faqradiisa 2aad ee Dastuurka JSL.

3. Waxaa sidoo kale waajib ah in markasta xeerkan loo fasiro si dani ugu jirto ilamaha xuquuqihiisu ee aan ka hor imanayn shareecadda islaamka

**Qodobka 3aad ee Ujeedooyinka Xeerka Caruurta** Waxaan Soo jeedin Lahaa in Faqradiisa 1aad iyo 3aad loo badalo Sidan, **1. In la helo xeer lagu sugaayo isla markaasna lagu ilaalinaayo xuquuqaadka ay caruurtu leeyihiin si waafaqsan shareecadda islaamka, Dastuurka JSL, Xeerarka kale ee Qaranka ee dhaqan galka ah iyo Heshiisyadda Caalamiga ah ee Qaramada Midoobey ee Xuquuqda Caruurta. 3. In la helo xeer jidaynaaya waajibaadka gaarka ah ee ka Saaran Dawladda haday tahay; Ilaalin**ta, fulinta, sare u qaadidda ama daryeelka xuquuqaadka ay leeyihiin Caruurtu.

**Qodobka 9aad ee Masuuliyaddaha Qoyska**, Waxaan ku darayaa Farqad 3aad oo odhanaysa sidan**:" Hadii aanu Ilmuhu lahayn Waalid iyo ehel Toona mas'uuliyadda Gaar ka ah ee Daryeelka ilmuha waxay toos u saarantahay Dawladda"**

**Qodobka 15aad ee Xaqa in laga ilaaliyo Dayacaadda** Waxaan soo jeedin lahaa in lagu daro Farqad 4aad oo tilmaamaysa Goorma ayaa loo aqoon sanaya in ilmaha la dayacay waxaanay u dhigmaysa sida**n "Hadii Masuulka Ilmahu (Waalidka, Ehelka ama Dawladda) uu muddo Bil ah bixin waydo Nafaqadda** ilmaha waxa loo aqoon sanayaa Dayacaad ilmo"

**Qodobkiisa 33aad** Waxaan soojeedin lahaa in meesha gabi ahaanba laga saaro GUDDIDA uu xeerkani ku Tilmaamaayo oo ah guddi gaar ah oo u xilsaaran xuquuqda caruurta, sababtoo ah waxaynu leenahay oo shaqeeya **Komishanka Qaranka ee Xuquuqul insaanka** oo qaranka uga masuul ah ilaalinta dhamaan xuuqaaqaadka uu qof kastaaba leeyahay oo ay ku jiraan caruurtu.

Mudanayaal looma baahna gudiddan qaran ee halkan xeerku ku sheegaayo maadama oo ay inooga baahan doonto **miisaaniyad** gaar ah. Loomana baahna in dalka boqolaal guddi

aynu ka curino oo aynu ogsoonahay in qaar badan oo hore u jirayba aanay maanta waxba Qarankan ugu filayn kharash iyo miisaaniyadd aynu siino Mooyaane. Sidaa awgeed waxaan soo jeedin lahaa in halkan lagu aasaaso waax si gaar ah u ilaalisa xuquuqda caruurta oo ka mid ah **Komishanka qaranka ee Xuuqul insaank**a. Waajibaadkeeduna wuxuu lamid noqon doonaa uun kuwan ku xusan isla qodobkan.

**Qodobka 37aad** ee ka hadlaaya laalista iyo Tirtirida waxaan soo jeedin lahaa in aan la odhan uun Xeer kani wuxuu laalayaa dhaman xeerarkii ka horeeyay ee dhaqan gal ka ahaa ee waa in loo dhigo hab uu ula shaqayn karo xeerarka kale ee ka hadla xuquudaadka caruurta sida **xeerka nidaamka garsoorka caruurta** oo ka hadla xuquuqaha ay leeyihiin caruurta sharciga ku xadgudubtay garsoorka hortiisa iyo walibana **xeerarka madaniga ee dalka**.

**Waxaan soo jeedin lahaa in loo dhigo sidan:**

1. Xeerkani wuxuu la shaqaynayaa xeerarka kale ee dhaqan galka ah ee la xidhiidha xuquuqaadka caruurta.
2. Haddii ay iska hor yimaadaan xeerkan iyo Xeerarka kale ee sida guud uga hadla xuquuqaadka caruurtu waxaa mudnaanta yeelanaaya xeerkan.
3. Dhinaca kale, haddii ay iska hor yimaadaan qodob amaba qodobo ka mid ah Xeerkan iyo xeerarka kale ee sida gaarka ah uga hadla Xuquuqaadka caruurta sida xeerka nidaamka garsoorka ee caruurta xeer Lr. 36/2007 waxaa mudnaanta yeelanaaya xeerarkaasi gaarka ah haddii aanay iyaga laftoodu ka hor imanayn shareecadda islaamka.

**Md. Axmed Maxamed Hure (Barkhad) (6min 21sec):-** waxyaabaha ugu mudan caruurta waxa ka mid ah in helo Xeerka ilaalinaya xuquuqda caruurta sidoo kalena dhisaya mustaqbal caruurta, marka in la helo xeerkaas lagama maarmaan bay u tahay Golaha.

Hadaba, anigoo guda galaya Xeerka waxaan soo jeedin in wax laba badalo ama wax lagu kaabo qodobadan soo socda: -

**Qodobka 7aad** kaas oo siduu dhigayo tilmaamayso masuuliyada gaarka ah, Farqadiisa 1aad waxay tilmaamaysaa masuuliyada gaar ah ee caruurtu inay saran tahay *Waalidka ilmaha ama daryeelaha ilamaha*, hadlka laba farqadood ee ka dambeeya ay xusayaan waalidka oo kaliya, marka waxaan soo jeedinayaa in labada **farqadood ee 2aad iyo 3aad** lagu daro **"ama daryeelaha ilamaha gacanta ku haya"** sida farqada 1aad.

**Qodobka 8aad** Waxa ku qoran xaqa cadaynta waalidnimada, marka waxaan soo jeedin lahaa in qodobkaas lagu daro oo laga dhigo **"xaqa caddaynta waalid iyo walaaltinimada"** waayo waxa jira dad badan oo xuquuqo walaaltinimo ay lahaayeen darteed isku qabsada walaalnimada, iyaga laftigooda lagu daro xaqa cadaynta

walaalnimada sidii loo cadayn lahaa. Marka **farqada 1aad** waxaan ku dari lahaa **xaraf "J"** oo noqonaya "**hadii laba ilme oo walaalo ahi ay ku murmaan walaaltinimada waa in loo raacaa xaqiijintooda si waafaqsan shareecada Islaamka, iyadoo ugu dambeyn lagu kala saarayo hide sidaha (DNA)"** cida xaqiijinta doonaysa noqoto cid ku andocooneysa walaaltinimada ee isle xuquuq baa kaa maqan.

**Qodobka 9aad ee** Masuuliyada Qoyska ka hadlaya, waxaan soo jeedin lahaa lagu daro **Farqada 3aad** oo cusub taas oo odhanaysaa **"hadii ilamaha waalidkiisu dhinto ama uu dayaco ama aanu awood u helin ehelka lagu tilmaamay farqada 1aad daryeelkoodu waxay u wareegaysaa Xukuumada, iyadoo ku wareejinaysaa xarumaha daryeelka caruurta"** marka waxaan soo galiyay halkaa in xukuumadu waajibaadkeedii qodobkaasna ka qaadato.

**Qodobka 21aad** ee xaqa waxbarashada u badka, farqadiisa 3aad waxay sheegaysaa in dawlada xil ka saran yahay waxbarashada carauurta aan ka korin da'dii waxbarashada, marka halka waxaan su'aasha taal waxa weeye, kuwa ka koray da'dii waxbarashada xuquuqdoodii xagay qabanaysaa. Sidaa darteed, waxaan soo jeedinayaa in lagu daro **Farqad 4aad** cusub oo u dhigan **"kuwa ka koray da'dda waxbarashada aasaasiga ah waa in Xukuumadu xil iska saartaa inay helaan aqoon la jaanqaadaysa da'doodda.**

**Qodobka 33aad** waxa ku jira khaldaad (typing error) ah oo **Illaalinta xuquuqda caruurta** halkii la qori lahaa baa laga dhigay **ilaalinta xuquuqda aadamaha**, marka waxaan jeclaan lahaa in **xuquuqda caruurta** lagu badalo".

Sidoo kale Gudidda illaalinta xaquuqda caruurta, maadaama xeerkani yahay Xeer barbaarinaya caruurta, mustaqbalkoodana la doonayo inay ku wanaagsanaadaan, waxaan jeclaan lahaa in Xubnaha dumar u bataan ugu yaraan boqolkiiba konton (50%), madaama iyagu inooga fara dhuudhuuban yihiin barbaarinta caruurta.

Sidoo kale, isla **Qodobka 33aad Farqadiisa 11aad** sida ay tilmaamayso waa in Xeerkan lagu faah-faahiya **awoodaha iyo waajibaadka Gudida**, oo sida loo dhigay laga daayo in Xeer-nidaamiye lagu faah-faafin doono.

Waxa kale oo aan jeclaan lahaa in la helo oo Xeerkan lagu dhex aasaaso, "Sanduuqa taakulaynta Caruurta" kaas oo ka taageeri doona caruuraha agoomaha ah, danyarta ama caruuraha qaba baahiyaha gaarka ah, marka xeerkana inay ku jirto qodob tilmaamaya in loo helo sanduuq maadaama ay jiraan baahiyo badan, sidaa la socotaan Miisaaniyadii u dambeysay ee aynu ansixinay meelihii ugu badnaa ee laga cabanayay waxay ahaayeen ubad agoomaha iyo kuwa la nool baahiyaha gaarka ah iyo kuwa xanuunada la nool. Marka waxaan soo jeedinayaa in Xeerkan lagu dhex abuuro sanduuq habeynaya kaalmadaas caruurta.

**Qodobka 35aad** waxa ku jira kalmado cul-culus oo ah dambiyada iyo ciqaabaha, waxaan soo jeedin lahaa in lagu badalo "cidda sharciga ku gefta" ama "cidda sharciga khilaafta" halkii ay ka ahayd "dambi".

Ugu dambeyn, waxaan soo jeedin lahaa meelaha Waajibaadka **dawladu** ku yaalo oo dhan in laga saaro oo laga dhigo Xukuumada, waayo waajibaadka Fulinta waxa leh Xukuumada, marka meelaha ay ku soo noq-noqonayso dawladu ha lagu badalo "**Xukuumada".** Waad mahad-san tihiin, WSC.

**Md. Bille Cabdi Ducaale (6min 21sec):- Qodobka 1aad** Magaca Xeerka waxaan soo jeedinayaa in laga **dhigo "Xeerka Xuquuqda Caruurta iyo Daryeelkooda".**

**Qodobka 3aad** waxaan ku raacsanahay Gudiddu siday soo jeedisay

**Qodobka 4aad** sida Gudidda waan waafaqay waxaanse ku kordhinayaa farqada 2aad oo ah **"in ilmuhu ku qaangaadho 15 sanno jir ugu hoosayn, si buuxda 18 sanno jira si waafaqsan Qodobka10aad ee Xeerka Nidaamka Garsoorka Caruurta.**

**Qodobka 5aad** waxaan soo jeedin lahaa in laga dhigo Qodobkaas sidan ***"Xeerakni wuxuu waafaqsanyahay Shareecada Islaamka, mabaa'diida guud ee la xidhiidha daryeelka iyo ilaalinta xuquuqda caruurta iyo Dastuurka, gaar ahaan Qodobka 10aad (2) iyo Qodobka 19aad Ee Dastuurka JSL"***

**Qodobka 6aad, Qodobka 8aad iyo Qodobka 89aad** waxaan aaminsanahay in sida Gudiddu ka soo dhigtay loo qaato.

**Qodobka 10aad Farqada 1aad** waxaan ku darayaa **"waxa loo raacayaa sida ay jidaynayso shareecada Islaamku"** halka **Farqada 2aad Xarfaha "A" iyo "B"** waxaan ku darayaa **"qaan-gaadhinimadiisa"** in xaga dambe laga raaciyo. **Xarafka "C"** waxaan ku darayaa markasta in tixgalinta kowaad la siiyo **diinta islaamku** waxay ka qabto", lama tixgalinayo ikhtiryaarka caruurta hadaanay jirin dulmi la taaban karo.

**Qodobka 11aad Farqada 1aad** waxaan ku darayaa **"iyadoo la eegayo da'diisa iyo qaangaadhnimadiisa 15-18 sanno jir"**

**Qodobka 12aad** waxaan ku raacsanahay Gudiddu siday soo jeedisay.

**Qodobka 15aad Farqadiisa 1aad** waxaan raacinayaa **"aan ka horimanayn Shareecada Islaamka, Dasuurka iyo Xeerarka Dalka"**

**Qodobka 16aad Farqadiisa 2aad** iyadana waxaan **"waxa loo raacayaa Xeerka Nidaamka Garsoorka Caruurta Xeer Lr. 36/2007 Qodobka 8aad oo ka hadlaysa xaqa xoriyada iyo Qodobka 47aad oo ka hadlaysa xadhiga ilamaha iyo nabadgalyadiisa iyo 55aad oo isaguna ka hadlaya damaanadda".**

**Qodobka 19aad Farqada 1aad** waxaan soo jeedinayaa in loo qoro sidan **"in lagu barbaariyo dhaqanka wanaagsan iyo ku toosnaanta diinta suuban ee Islaamka".** Isla Qodobkaas **Farqadiisa 2aad** aan soo jeedinayo in loo dhigo sidan **"in lagu barbaariyo adeecidda Eebe (SWT) iyo Rasuulkeena (SCW), waalidka, dadka wanaagsan iyo cidkasto ixtiraam ka mudan"** halka Farqadiisa 3aad laga dhigo **"in lagu barbaariyo baarnimada Waalidka, masuuliyad si markuu waynaado u guto masuuliyadaha ka saran Shareecada Islaamka, Dalkiisa, Dadkiisa iyo Diintiisaba"**

**Qodobka 20aad Farqadiisa 1aad** waxaan ka dhigayaa sidan **"ilme kasta wuxuu xaq u leeyahay in si rasmiya magac loogu bixiyo markuu dhasha, maalinta 7aad loo wanqalo hadii la karo".**

**Qodobka 21aad Farqada 2aad** waxaan ku sii darayaa "**si uu anfaco noloshiisa dambe, dalkiisa, dadkiisa iyo diintiisa"**

**Qodobka 23aad Farqadiisa 2aad** waxaan ka dambe kaga darayaa **"ee Xeerkan"** halka **Farqadiisa 7aad** aan xaga dambe ka raaciyay **"Ilmaha".**

**Qodobka 24aad** waxaan ku raacsanahay Gudiddu siday soo jeedisay.

**Qodobka 26aad Farqada 1aad** halka u dambeysa ee ah "Sumcada Ilmaha" waxaan ka dhigayaa **"Sumcada ilmaha *ee Xun*"** oo waxaan raaciyay **ee xun**.

**Qodobka 27aad Farqada 3aad** waxaan soo jeedinayaa in marka la marayo "*mucaahadada caalamiga ah ee xuquuqda carruurta"* in lagu sii daro *"ee aan ka horimanayn Shareecada Islaamka" waxayna noqnaysaa* **"mucaahadada caalamiga ah ee xuquuqda carruurta ee aan ka horimanayn Shareecada Islaamka"**

**Qodobka 28aad** waxaan ku raacsanahay Gudiddu siday soo jeedisay, **Qodobka 29aad** sidiisii hore in loo daayo ayaan taageersanahay, halka Qodobka 30aad aan ku darayo "yo Xadhiga"

**Qodobka 35aad Farqada 4aad** waxaan ku darayaa goob ku haboon xaalada ilmaha "**sida ku cad Qodobka 8aad farqadiisa 3aad iyo Qodobka 28aad ee Xeerka Nidaamka Garsoorka Caruurta.**

Sidoo kale waxaan soo jeedinayaa in **caruurta garsugayaasha ah lala akhriyo Qodobka 49aad** ama laga qaado **damaanad sida ku cad Qodobka 55aad ee Xeerka Nidaamka Garsoorka Caruurta Xeer Lr. 36/2007.**

Sidoo kale Xeerka Nidaamka Garsoorka Caruurta Xeer Lr. 36/2007 Qodobkiisa 10aad Farqada 1aad waxay sheegaysaa qofkasta oo markuu galo dambi aan gaadhin 15 jir am ka yar aanu lahayn dambi, waxa leh masuuliyada dambi wixii 15 jir ka wayn. Sidoo kale qofkasta oo dhamaysta 15 jir ilaa uu ka gaadhayo 18 jir wuxuu yeelanayaa masuuliyad damabi oo loo raacayo xeeka Ciqaabta Guud laakiin maaha mid dhamaystiran. Marka

waa in Xeerkan lala akhriyo Xeerka Nidaamka Garsoorka Caruurta Xeer Lr. 36/2007 gaar ahaan qodobadiisa aan soosheegay sida Qodobka 8aad, 10aad, 28aad, 49aad, 55aad iyo wixii la mid ah ee Xeerka ay haboon tahay in lala akrhiyo.

**Md. Maxamed Xuseen Maydhane** (5min 05sec):- **Qodobka 3aad** waxaan ku raacsanahay sida Xildhibaan Bille soo jeediyay

**Qodobka 5aad** waa in lagu badalaa **"Waafaqsanaanta Shareecada Islaamka iyo Dastuurka".**

**Qodobka 6aad** ee Masuuliyada Guud **Farqada 3aad** waxaan soo jeedinayaa in loo qor sidan **"Wasaarada Shaqo-galinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoyska ayaa leh Masuuliyada guud ee Illaalnta xuquuqda caruurta aan haysan cid daryeesha iyo dhaqangalinta xeerkan, iyadoo la kaashanaysa hay'ddaha kale ee dawlada JSL".**

**Qodobka 10aad Farqada 2aad Xarafka "A"** sida uu u qoran yahay waan ka saarayaa oo waxaan u badalayaa in laga dhigo sidan **"Xuquuqda Shareecada Islaamku siisay Ilmaha".**

**Qodobka 10aad** waxaan soo jeedinayaa in ciwaankiisa oo ah xaq ixtiraamka loo badalo **"xaqa ixtiraamka shareecada Islaamku siisay".**

**Qodobka 14aad** xaqa nolosha badbaadada iyo horumarka waxa ka horeeya in loo ilaaliyo caqiidadiisa, marka anigu waxaan dhigi laha **farqada 1aad** sidan **"ilme kasta oo u dhashay Somaliland wuxuu xaq u leeyahay in loo ilaaliyo caqiidadiisa diinta Islaamka, Noloshiisa iyo horumarkiisa".**

**Qodobka 16aad** ee xoriyada iyo amniga ilmaha waxaan **farqada 1aad** u badalayaa sidan **"ilme kasta oo Somaliland u dhashay wuxuu xaq u leeyahay inuu helo xaqa xoriyada iyo amniga shareecada Islaamka iyo Dastuurka Qaranku u jidaysay".**

**Qodobka 24aad** ee Xaqa ilaalinta caruurta baahyaha gaarka ah leh, ma cadda cida qaadaysa masuuliyadooda, sidaa darteed, waxaan soo jeedinayaa in lagu daro **xaraf "D" ah farqada 1aad** taas oo u dhigan sidan **"waxa masuuliyadiisa qaadaysa Wasaarada shaqo-galinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoyska oo wakiil uga ah Dawlada Somaliland".**

**Qodobka 27aad** ee xaqa ka-faalo qaadashada ilmaha, waxaan soo jeedinayaa in lagu daro farqad cusub oo u dhigans sidan "**ilamaha aan la aqoonsan hayb ahaan sida caruurta la tuuro iyo wixii la mid ah waxa ka faalo qaadaysa Dawlada Jamhuuriyada Somaliland"** isla Qodobkaas **Farqadiisa 3aad** waxaan soo jeedinayaa in lagu daro **"waxa loo raacayaa shareecada Islaamka".**

**Waxaan ku soo gab-gabaynaa: -**

- Waa in Xeerka laga saaro macaahadooyinka caalamiga ah eek u jira, WSC.

**Md. Maxamuud Jaamac Faarax (04min 15sec):-** anigu hal qodob baan ka hadlayaa oo ah Qodobka 24[aad], kaas oo aan doonayo inaan muuqata u faah-faahiyo baahidiisa balaadhana la wada gaadho, Qodobkaasi wuxuu dhigaayaa xaqa caruurta baahiyaha gaarka ah leh. Anigu waxaan arkay ilme ku dhashay magaalda Hargeysa, markuu sannad jiray xanuunsaday oo dhakhtar itoobiya ah la geeyay, dhakhtarkii uu soo sheegay xanuun, xanuunkaasi waxay sheegeen inuu u baahan yahay 14 cisho irbad, irbadaas oo noqonaysa $1,500, bishii waa $3,000 oo ah laba irbadood, qoys qabiil, xaafad iyo reer midna bilkasta ma bixin karto, cid dabari kartaana ma jirto.

Marka waxaan soo jeedin lahaa xanuunada noocaas ah ee daawadoodu sidaa u qaalisan tahay in dawladu dabarto oo qaadato oo Miisaaniyada wax loogu daro, iyadoo tafsiir dheeraada la siinayo sida "in xanuunada dawadoodu ka qaali san tahay $2000 bishii in dawladu kafaalo qaado.

Waxa kale oo aan arkay dhakhtarka wadnaha ee Gargaar ayaan la macaamilaa, waxa diiwaangashan caruur gaadhaysa 300 oo caruur danyar ah oo wadnuhu dalloolo, kuwaas oo guryohoodii iska jiifa, awoodna u la' in la qalo oo dakhtarkaasi wax ka-qabto, iyadoo aan la helayn aduun, xagii ganacsatada iyo tujaarta qaylo dhaan baa loo diro way ka jeensadeen, xaga xukuumada ma garanayo in warka la gaadhsiiyay.

Marka waxaan soo jeedin lahaa ubadka diiwaangashan ee Hargeysa ku nool, wax laga yaabaa inay Gobolada oo dhan ka soo jeedaane, kuwaa inta laga bilaabo, inay dawladu si toos ah u qaadato ay wadnaha caruurtaas uu daloolo u xidho, dhakhtarka kaa bixiso, iyadoo kharashka ku baxayaa uu mar kaliya uu yahay (one time), kuwa xanuunada gaarka ah la noolna aynu xeerkan si cad ugu cadayno.

Waxaan codnayaa in xildhibaanada iga dambeeya inay caruurtaas baahiyaha gaarka ah iyo xanuunkaas wadnaha u baahan in laga qalo aynu u sameyno Miisaaniyada iyo in amar dawlada lagu siiyo inay damaanad qaado.

**Md. Axmed Cabdi Muuse (Inni) (6min 21sec):-** Shir-gudoonka, Mudanyaasha iyo saxaafadaba waan idinku salamaaya salaanta Islaamka ASC, bacda salaan, hadaan guda galo Xeerkan, marka hore waxaan u mahad-naqayaa Gudiddii ka soo shaqaysay Xeerkan.

**Qodobka 1[aad]** ee Erey-bixintu waxa ay u baahan tahay in si sax loo fasiro ereyaada micnahoda oo dib loogu celiyo gudiddii.

**Qodobka 7[aad] Farqadiisa 1[aad]** waxaan soo jeedinayaa in loo qoro sidan **'Masuuliyada gaar ah ee ilaalinta xuquuqda caruurta waxa xil ka saaran yahay waalidka ilmaha ama daryeelaha ilamaha gacanta ku haya iyo dawlada".**

**Qodobka 15[aad]** waxaan ku raacsanahay sida uu soo jeediyay Xildhibaan Mubaarik Xeel-dheere.

**Qodobka 18aad Farqadiisa 1aad** waxaan ku raacsanahay Xildhibaan Xasan kayse.

**Qodobka 28aad Farqadiisa 1aad** waxaan soo jeedinayaa in loo dhigo sidan **"ilme kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu helo adeeg caafimaad marka ay la soo gudboonaato xaalad caafimaad u muuqata mid aan daawo lahayn oo aan dalka gudiihiisa iyo dibadiisaba".**

**Qodobka 35aad Farqadiisa 3aad** waxaan u badali lahaa sidan **"ilmaha sharciga khilafa waxa loo samaynayaa in laga leexiyo xabsiyda dadka waawayn, waxaana loo samaynaa xabsiyada caruurta ee ku haboon kuwaas oo ay ka helayaan waxbarasho mudadda ay xidhan yihiin"**

**Soo jeedimo Guud.**

- Waxaan soo jeedinayaa in xaqa ilaalinta iyo daryeelka caruurta lagu daro oo si gaar ah loogu magacaabo looguna xulo ciidamada asluubta kuwa aqoonta gaarka ah u leh daryeelka caruurta, kana qayb-qaataan waxbarashadooda, ilaalintooda iyo asluubtooda togan.
- In la hubiyo waxbarashada caruurta lagu hayo xeryaha gaarka ah, manhajka loo dhigo oo uu noqdo kan Wasaarada Waxbarashada, si looga hortago manhajyada kale ee sita ama xambaarsan siyaasadaha iyo dhaqamada dalalka kale, laguna faafinayo ujeedooyinka gaar ah.
- Caruurta dibada ka timaada ama laga keeno in loo abuuro meelo ama xeryo ku haboon in lagu dhaqan celiyo caruurta, tiiyoo loo diyaarinayo dhaqankeena suuban.
- Waxaa la qabaa Xldhibaanada ka hadlay in loo helo xeerar lagu ciqaabo qofkasta oo u gaysta xad-gudub gaar ah u badaka ama caruurta laga garo.
- Caruurta la celinayo waxa loo baahan yahay in dalku ka yeesho xeerar iyo siyaasad kuwaas oo loo kala saarayo kuwa ku dhashay dalka iyo kuwa dibada ku dhashay.

**Md. Abiibokar Siciid Cali: - (06min 30sec):-** Mudane Gudoomiye, Mudanayaasha Sharafta leh, Shaqaalaha iyo Saxaafada ASC, bacda salaam. Runtii waxaan u mahad celinayaa gudidii soo gudbisay ee soo lafagurtay xeerkan oo ka kooban 38 qodob, iyagoo wax ka soo badalay ilaa 19 qodob, taas oo micnaheedu tahay inay intii badnayd wax ka badal iyo kaabis ku soo sameeyeen.

**Qodobka 2aad** ee sheegaya Magaca Xeerka oo ay ku soo koobeen Gudiddu Xeerka Xuquuqda Caruurta, halku hore u ahaa Xeerka Illaalinta Xuquuqda Caruurta, waxaan soo jeedinayaa magaca Xeerka sidiisii hore loo daayo, si magucu u noqdo mid ka tirjumaya nuxurka xeerku xambaarsanyahay.

**Qodobka 13aad Farqada 1aad** halka ah in la helo xeer Tilmaamaya, waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo **"in la helo Xeer cadaynaya"** isla mar ahaantaana marka la

sii raaco in laga saaro **"Xaaladaha" oo farqadaasi noqoto "In la helo xeer cadayna masuuliyadda guud iyo gaar ahaaneed ee lagu ilaalinayo xuquuqda iyo daryeelka carruurta".**

**Qodobka 21aad** ee xaqa waxbarashada, **Farqada 3aad** sida meesha ku qoran tahay, **Dawladda ayaa xil ka saaran yahay"**, taas oo aan u arko inay balaadhan tahay, marka waxaa haboon tahay in laga dhigo **"Dawladda ayaa xil ka saaran yahay iyadoo ay masuul uga tahay Wasaarada Arrimaha Bulshada iyo Qoyska sidii carruurta aan ka korin da'da waxbarashada ay u heli lahaayeen waxbarashada aasaasiga ah ee Dastuurku u waajibiyay"**

**Qodobka 23aad** ee Gudiddu wax ka badashay wuxuu u dhigan *yahay Ilme kastaa waxa uu xaq u leeyahay in uu la noolaado oo ay daryeelaan waalidkiisu, haddii aanay ka degin/gudan kariwaayin masuuliyaddii waalidnimo ee shareecadu u jidaysay,* markaa si qofka akhrinaya aanu micnahu uga tagin waxaan soo jeedinayaa in loo dhigo sidan **"Ilme kastaa waxa uu xaq u leeyahay in uu la noolaado oo ay daryeelaan waalidkiisu, haddii ay gudan kariwaayaan masuuliyaddii waalidnimo ee shareecadu u jidaysay."**

**Qodobka 24aad Farqada 2aad** waxa la soo celiyay hadalkii farqada 1aad, markaa waxaan soo jeedinayaa in loo dhigo sidan **"si ilme kasta oo ku sugan xaaladaha lagu xusay farqada 1aad ee Qodobkan uu helo xuquuqdahaas, waa in Gobol kasta laga aasaasaa xarun daryeel caruurta qaba baahiyo gaar ah lagu daryeelo"**

**Md. Eng. Xirsi Cabdilaahi Xirsi (9min 40sec):-** Mudane Gudoomiye, Mudanayaasha Golaha, Shaqaalaha, saxaafada iyo Marti-sharaftaba ASC, marka hore waxaan ku horeynaa hordhac inta aan xeerka qodobadiisa gudogalin.

Marka kowaad, meel kasta oo xuquuq ama ciqaab looga hadlo waa inaynu ku kabno sida dhigayso shareecada Islaamku ama ay ogoshahay.

Marka labaad, meel kasta oo lagaga hadlay danta/xuquuqda caruurta waa in lagu kabo in muhiimad gaar ah la siiyo caruurta baahiyaha gaarka ah qaba.

Marka saddexaad, si guud waxaan dhamaan bulshada u xasuusinayaa caruurta qabta xanuunka otiisamka way ku noolaan karaan nolol caadi ah, hadii la fahmo lana siiyo adeegyada u baahan yihiin, dadka aduunka wax ka badalay waxa ku jiray dad qabay xanuunkaas otiisamka. Waana in lacaawiyo waalidka caruurta baahiyaha gaarka ah qaba sida otiisamka haysta.

Hadaan u galo Qodobada Xeerka.

**Qodobka 1aad** ee Magaca Xeerka waxaan ku raacsanahay Xildhibaan Kaare in laga dhigo **Xuquuqaha** maadaama ay jiraan xuqooqo badani.

Qodobka 9aad waxaan ku dari lahaa “la ixtiraamo doonista ehelda”

**Qodobka 11aad Farqada 1aad** waxan soo jeedinayaa hadii aanu ilmuhu qaangaadhin aragtiyaha iyo rabitaanka ilamaha waxa lagu kaabayaa ta waalidka.

**Qodobka 14aad** waa in lagu daraa “Shareecada Islaamku jidaysay”

**Qodobka 16aad farqada 2aad** waa in lagu sii daraa **“hadii aanay ku dantiisu ku jirin oo ay isku raaceen waalidkiisa iyo maaxkamadu”.**

**Qodobka 19aad** ee Xaqa waxbarashada waxaan ku dari lahaa **“si uu u guto masuuliyada ka saran Shareecada Islaamka, Dalkiisa hooyo, dantiisaka gaarka ah iyo tan guud".**

**Qodobka 22aad Farqada 1aad** waxaan ku sii darayaa **“hadii aanu qabib baahiyo gaar ah oo ilaalin gaar ah u baahan”**

**Qodobka 24aad** ee Xaqa ilaainta caruurta baahiyaha gaar ah qaba Farqada 2aad ee Gudiddu ku soo dartay ha laga saaro ayaan soo jeedinayaa, waxaana ku dari laha farqad cusuboo u dhigan sidan **“Dawladu waa inay xoojisaa goobaha waxbarashada caruurta baahiyaha gaarka ah qaba”.**

**Qodobka 25aad** in lagu daro **Farqada 2aad** oo u dhigan sidan **“waa in la dhiirigaliyaa goobaha ciyaaraha caruurta baahiyaha gaarka ah la nool”.**

**Qodobka 27ad waxaan soo jeedinayaa in** lagu daro **Farqada 4aad** oo u dhigan sidan **“ilamaha la kafaalo qaaday wuxuu lahaanayaa abtirsiimadiisa hore ee aabaha dhalay sida shareecada Islaamku dhigayso”.**

**Qodobka 28ad waxaan soo jeedinayaa in** lagu daro **Farqada 4aad** oo u dhigan sidan **“Ilmaha aan qaangaadhin marka kaalmo sharci la siinayo waa in waalidkiisa joogaan”.**

**Qodobka 36ad** waxaan soo jeedinayaa in loo badalo sidan **“dambiyada laga galo caruurta waxa loo raacayaa xeerarka dhaqangalka ah ee khuseeya caruurta iyo xeeraka ciqaabta guud”.** Sidoo kale lagu daro farqad cusub oo 2aad una dhigan sidan **“Wasaarada Arrimaha Bulshada, Gudidda Illaalinta Caruurta iyo maxkamada waa inay sameeyaan Xeer-nidaamiye loo raacayo ciqaabta cidii dambi ka gasha caruurta taas oo aan ku cadayn Xeerarka dhaqangalka ah”**

**Md. Xasan dhuxul laab-saalax (3min 13sec):-** Illaahay baa keligii mahad leh, Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal ASC, Mudanayaal markaad si dheer iyo si dhowba u eegay xeerkan isla markaana aan dhegaystay doodda Mudanayaasha waxaan odhan lahaa waa la yidhi, laakin adkayn bay u noqon doonaan qodobo koob kooban ku saabsan sida Xildhibaan **Barkhad Hure**, Xildhibaan **Xirsi** iyo Xildhibaan **Axmed Inni** iska daba mareen, waxaan adkaynayaa xuquuqda caruurta baahiyaha gaarka qaba ama ku jira xaaladahan gaarka ah.

Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal waa xeerkani si toosa oo aan humaag ku jirinay uu xuquuqdooda u damanad qaada, waxaan soo jeedinayaa xuquuqda caruurta baahiyaha gaarka leh ee xeerkani jidaynaya waa in dawladdu si toosa u kafaala-qaada sida uu jidaynaya Qodobka 19aad ee dasturka qaranka.

Mudanayaal, waxaa jira caruuro da'ddoodu ka hoosayso 15 jir oo la xidho laguna xidho saldhigyada iyo jeelasha dadka waaweyn, waxaan soo jeedinayaa in xeerkani xarimo, 'mamnuuco oo si cad uu u sheego inay ilma da,diisu ka hoosayso 15 jir aan lagu xidhi karin goob, wuxuu sameeyey wax ka weyn buu kaso bartaa, sideedaba banaan mudanayaal, maxkamaduhu kama garnaqaan moralityga ee actions ka ayay ka garnaqaan, waxaan soo jeedinayaa in ilma da'diisu ka hoosayso 15 sanno aan xukun ku dhici karin oo xeerkani damaanad qadayo/

Mudanayaal, waxaa jira caruuro dibadda laga keeno oo waalidkoodu dalka u keenaan badbaadinta dhaqankooda iyo diintooda balse dawladihii ay la joogeen ay ka daba yimaadaan xeerkana ma cadaynayo in uu difaac u yahay caruurta halkan la keeno. waa in qodobadiisa si toosa loogu sheega, waxaan Xildhibaan Xirsi ku taabacsanahay caruurta ay dhaleen macaliminta iyo askartu in xaaladooda si dhow xeerkani uga turjumo oo loola socdo.

**Md. Axmed Cabdi Ducaale** **(3min, 50sec):-** Bismilaahi, Waxaan ka bilaabayaa magaca Xeerka waxaana ku raacsanahay xildhibaanadii soo jeediyey in laga dhigo erey bixinta xeerka xuquuqaha caruurta sidaas baan soo jeedinayaa.

**Qodobka 21aad** ee ah xaga waxbarashada caruurta aniguu waxaan odhan lahaa caruurta maanta Somaliland ku nool waxaa fiicnaan lahayd inay inoo cadaato oo inoo kala abla ablaysnaanto tiradooda iyo sida baahiyahoodu kala yihiin, dee kolay xeerka meelna kagama qorna oo waxaa mooda inay taasi suurtagal ahayn, caruurta laga hadlayaana anigu waxaan odhan lahaa aynu qodob ku darno u kala qaybinaya laba qaybood oo kan kowaad yahay caruurta da'ddoodu u dhaxayso wakhtiga dhalashada ilaa 6 jirka, kan labaadna 6-15 jir, waa inaynu sidaa u kala saarno caruurta xuquuqohooduna way kala duwananayaan.

Waxaynu ognahay caruurta sannadka kowaad inaysan waxbarasha u baahnayn ee ay daryeel iyo korin u baahan yihiin, markay yara koraana way is-badelayaan oo waxay yeelanayan xuquuqo ka badan kuwii hore, waxbarashay u baahan yihiin, daryeel bay u baahna yihin, marka qodobka in lagu daro ayaa soo jeedin lahaa oo ah qodob ka hadlaya caruurta baahiyaha gaarka qaba.

Xaga waxbarashada waa inuu helo ilma kastaaba waxbarsho bilaasha, waxaan ku raacsanahy xildhibaanadii iga horeeyey inay waxbarashadu noqoto mid bilaasha.

Qodobka kale aan ka hadlaaya waa caafimaadka, waxaan u arkaa inuu yahay muhiim, dhakhatar kan inagu dhow waxa yaala caruur fara-badano waalidkooduna ay joogaan, waxbana aanay u qaban Karin, markaa anigu waxaan qabaa in caruurtu isku mid yihiim oo xuquuq isku mida leeyiihin ama waalid hala haadeen ama yaanay lahaane, waxay ku xidhantahay duruufaha caruurta haysta, waxaan soo jeedinayaa in caruurtu marka hore yeeshaan xaq guud oo aan loo kala saarin mid waalid leh iyo mid aan lahayn.

Waxaan soo jeedin lahaa fikirkayga in xeerka wax badan ka dhiman yihiin dib loogu noqdo oo baaritaan la sameeyo, tira koobka caruurta Somaliland joogta la soo sameeyo, maxaa loo qabankara iyadoo dawladda la kaashanayo, waxaan qabaa in xeerka dib loo yara dhigo aynan ku deg-degin.

**Md. Maxamed Abiib Yuusuf (6min, 33sec):-** Mahadsanid Gudoomiye, Alxamdulilaahi Rabilcaalamiin Wabihi Nastaciinu Calaa Umuuri Dunyaa Wa Diin, Waxaan dooddayda la qabaa mudanayaasha kala ah Xildhibaan Xirsi, Xildhibaan Xassan iyo Xildhibaan Axmed Maxamed Maxamuud, sidoo kale waxaan la qabaa dooddii Xildhibaan Maxamuud ee ahayd in Caruurta wadnuhu uu daloolo oo tirro kooban ah Masuuliyad Dawladu iska saarro.

Intaa markaan ka soo gudbo waxaan dul istaagayaa dhawr qodob oo kooban, Qodobka ugu horeeya ee aan meeshan qaban dadka sidan u nugulna Gudi loogu sheego ay qalad tahay waxaa weeyaan **Qodobka 33aad** Guddida Qaran ee ilaalinta Xuquuqda Caruurta Caruurta, sidee ayay suurtagal u tahay in Agaasimayaasha Guud ee Wasaaradaha ugu mashquulka baddan dadlku ay masuuliyad u qaadaan dadka sidan u nugul? Suurtagal ma noqonayso waayo in ay kulmaan oo ay arrintan ka wada hadlaan ayaaba adag.

Markaa Mudane Gudoomiye iyo Mudanayaal dadkaasi waa dad jilicsan, waa caruur koriin u baahan, waa caruuru gidaar la dhigay, waa caruur u baahan in maalin walba arrimahooda iyo dhacdooyinkooda hadii ay noqon lahayd kuwa gidaarada la dhigayo iyo ku meelo kala lagu tuurayaba la deal-araysa ayaa loo baahan yahay. Markaa hadii aynu rabno xubno si dhab ah u waajaha arrintaa waan in guddida halkan lagu Aas-aasay la tirtiro waana in cid madaxbanaan oo gacanta ku haysa loo sameeyaa waayo waa mustaqbalkii wadankan.

*Waxaan oo jeedinayaa in la Aas-aaso Guddi haween u badan sidii uu Xildhibaan Axmed sheegay kana madax banaan shaqooyinkaa qaranka ee ay hay'adahaasi ku mashquul sanyihiin.* Tusaale ahaan marka aad eegto Agaasimaha Guud ee Wasaarada Wax-barashadu haleelkiisu waa noocee? Agaasimaha Guud ee Wasaarada Horumarinta Caafimaadku haleelkiisu waa caynkee? Agaasimaha Guud ee Wasaarada Arrimaha Guduhu waa caynkee haleelkiisy? Suurto gal inoo noqon mayso in dad shaqada intaa le'eg inoo haya aynu ku halayno caruuraha dayacan ee waa in aynu qodobkaa Meesha ka saarno.

Mudane Gudoomiye, xeerkan waxaa kale oo aan ku xusnayn Xaqa nuujintu, mararka qaarkood xaqa nuujinta qoysasku way isku qabsadaan, iyada oo uu quraankeenu

sheegay, markaa waa in xeerkan lagu daraa xaqa nuujinta hadi labada waalid ay isku qabtaan nuujinta oo ay maxkamadda yimaadaan si loogu kala boxo.

Sidoo kale, waxaa jirra oo aan ka warqabnaa hooyooyin la nool xanuunka HIV-ga, hooyada si fiican u qaadata daawadu, hadii ay nuujiso ilmeheeda uma gudbiso xanuunka, laakiin hooyada aan qaadan ee u gudbinaysa ilmaha waa in ciqaabta ka dhalanaysa xeerkan lagu muujiyaa, waayo caruur yar-yar oo xaq u leh in ay noolaadaan ayay hooyadaasi u gubinaysaa.

Dhanka kale, dhakaatiirta ka umulinaysa hooyada xanuunka la nool waa in ay xirfad u leeyihiin in ay hooyadaa iyo ilmeheeda kala badbaadiyaan, waayo caruurtaasna masuuliyada ayaa inaga saaran, waa in dhakaatiirtaasi loo tababaray in caruurtaa ay ka badbaadiyaan xanuunka oo ay iyaguna waajibkaa gutaan, isla markaana ay u warbixiyaan guddida halkan lagu Aas-Aasi dooono si xaaladooda u la socdaan iyo Nuujintooda.

Kafaaladu waa laba lsakiin xeerkan waxaa ku xusan mid ka mid ah, kafaaladaa oo ah mid khasab ah iyo mid qofku si mutadawacnimo ah uu u soo bandhigayo, ta khasanka ahi waa ta qaraabadii waajibka ay ku ahayd gutaan hadii waalidkii uu dayaco caruutii, markaa waa in ay labadaa kafaalana ay kala cadaadaan oo lagu soo kordhiyaa kafaalada khasabka ah.

Waxaa aad iyo aad u murugo badan oo had iyo goor iskuuladeena ka dhacda in Caruurta waalidiintood ay la noolyihiin xanuunka HIV-ga la takooro, in macalimiinta qaar ay eryaan, markaa waxaan soo jeedinayaa in xeerkan lagu xuso in cidda kula kacda dhaqanka takoor ciqaabtooda.

Mudane Gudoomiye iyo Mudanayaal xeerkan waa in lagu cadeeyaa danbiyada laga galo caruurta oo aad u farro badan, waxaan ka warqabnaa in hay'adda UNICEF ay saldhigayada qaarkood ka fulisay laba-laba qol oo caruuta loogu talo-galay in lagu xidho, sidoo kale waxaad ka warqabtaa in caruurta lagula xidhi dad danbiyo ka waaweyn galay, halkaasna ay ku soo baranayaan danbiyo ka duwan kuwii ay galeen oo ay ahay madarasad ay ku soo bartaan danbiyo kale.

*Waxaan adkaynayaa oo aan soo jeedinayaa In Booliska lagu khasbo qololkii loo dhisay oo loo baneeyo hadii ay jiraan caruur danbi gashay. Sidoo kale waa in Saldhigyada aanay ka dhisnayn qolalkii caruurta loogu talo galayna waa in loo dhisaa, oo waxaa masuuliyadaana leh Wasaarada Arrimaha Gudaha iyo Booliska.*

Waxaa kale oo iyaduna arrin murugo leh ah oo wax baryahana inagu soo badanaya ah caruuraha la tuurayo, caruurtaas oo intooda badan la kulmi dayac badan, waxaana sabab u ahaa xeerka caruurta oo aan hore u jirin, markaa inaga oo hada xeerkii wadna aynaan ku darin ciqaabaadka ka dhalanaya, marka ilme la helo waa in Boolisku si dhab ah oo qoto dheer u baadhaa ilaa laga helayo cid ilmahaa Meesha dhigtay waayo waa dil.

Mudane Gudoomiye iyo mudanayaal Golahani rag badan oo sharci yaqaano ah ayuu leeyahay, waxa loo baahan yahay in lala kaashado raga maxkamadaha ee sharci yaqaanada ah si ay xeerkan wixii ka dhiman wakhti loogu helo oo aynu si wanaagsan uga baaraan degno ayaan soo jeedinayaa, aad iyo aad ayaad u mahadsantahay Mudane Gudoomiye.

**Md. Axmed Maxamuud Cabdilaahi (4min 10sec):-** Mudane Gudoomiye, Mudanayaasha Golaha, xoghaynta shaqaalaha, saxaafada iyo marti-sharafta ASC.

Mudane Gudoomiye, marka laga hadlayo xaquuqda caruurta, mid ka wanaagsan xaquuqda ay siisay diinta islaamku oo Allh inafaray oo aynu ku dhaqanaa ma jirto cidkeeni kartaana taa mid ka wanaagsan, xuquuq ay katagtayna ma jirto makhluuqaadka uu Allh abuuray dhamaanteedna Allh waa uu inawada siiyayeerkana waa mid tafsiiraya sidaas awgeed, marka hore waxan ku raacsanahay Gudidu tafsiirka ay ka bixisay, xeerka Qodobadiisa qaar ka mida, anigoo taa ka duulaya waxan doonayaa qodobadaa inaan yara taabto, sida , **Qodobka 3aad** ee ujeedooyinka xeerka farqadiisa 1aad waxay leedahay in la helo hannaan sharci oo ilaaliya xuquuqda caruurta si waafaqsan shareecada islaamka, Dastuurka JSL, xeerarka kale ee dhaqan-galka ah iyo mucaahadada qaramada midoobay ee xuquuqda caruurta,

Waxan leeyhay qodobkaa farqadiisaa 1aad horta marka hore ma jirto hanaan sharci oo lahelayaa oo aynu hore u haysanay, markaa waxan leeyahay waa in lagu soo koobaa, *waa in loo raacaa hanaanka sharci ee ilaalinaya xuquuqda caruurta si waafaqsan shareecada islaamka, maadaama uu xeerkani uu kusalaysanyahay dhamaantii shareecada islaamka,* waa inaanay soogelin mabaadiida wadamada kale ee-aana shareecada ku dhaqmin, laguna soo koobo uun intaa aan kusoo koobay uun oo ah waa in loo raaca hanaanka sharci ee ilaalinaya xuquuqda caruurta, siwaafaqsan shareecada islaamka qodobkaa intaa saan kaga tegayaa.

**Qodobka 20aad** oo ah xaqa magaca dhalashada iyo aqoonsiga, farqadiisa 1aad ilme kastaa wuxuu xaq u leeyahay in si rasmi ah magac loogu bixiyo.

Waxan kusoo kor dhiyay anigu si waafaqsan shareecada islamka

Qodobka 21aad oo ah xaqa waxbarashda farqadiisa 1aad ilme kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu helo waxbarasho diimeed iyo mid maadi ahba oo aas-aasi ah.

***Waxan ku soo kor dhiyay halkii ahayd waxbarasha diinta ayaan kadhigay waxbarashada islaamka.***

**Md. Nuuradiin Axmed Dayib (3min 58sec):-** Bismilaahi gudoomiyaha golaha wakiilada labada gudoomiye kuxigeen mudanayaasha barlamaanka dhamaan shaqaala weynaha golaha bahada saxaafada intaba waxan ku salaamayaa salanta islaamka asalamucalykum.

Marka labaad waxan u mahad celinayaa gudidii gudoomiyaha ka ahaa Xildhiban Yaxye arrinkan soo lafa guray wax kabedelna kusoo sameeyay intaa markaan kasoo gudbo.

Laba qodob ama sadex qodob Ayaan dul istaagi doonaa intii uu ilahay I waafajiyo

Qodobka ugu horeeya waa qodobkaa waxbarashada caruurta, sidaan wada og soonahay waxaa jira waalidiin farabadan oo aan awoodin waxbarashada caruurtooda, markaa waxaan codsan lahaa oo aan golaweynaha ka codsan lahaa, waxaynu nahay masuuliyiin, umad baa ina soo dooratay, umadii ina soo dooratay meel kastay joogaan way ina soo eegaysaa bari ilaa galbeed saylac ilaa yoocada, umadaasi waxay inaga sugaysaa wax-qabad dhan kasta ah, waxqabadkooda ugu horeeya waa matalaadooda oo si dhaba sitoosa uga hadalno, waxan codsanlahaa sidii aynu taariikhdana u galno aakhiriyo aduuna u liibaano 82keena mudane inaynu kafaalo qaadno 82 agoon waxbarashadooda, waan awoodnaa, waan bixin karnaa, aakhiyo aduunba waynu lii baanaynaa, ***Waxan soo jeedinayaa markaa mudanaha ugu horeeya waa aniga qodob waakaas***.

Qodobka kale, dhanka caafimaadka waxa mudanayaashii iga horeeyay in badan ka dhawaajiyeen caafimaadka iyo waxbarashadu waa inay xukuumadu lawareegtaa, su-aasha is weydiinta mudani waa xukuumadu awood ma u leedahay inay lawereegto, iyada laf-tirkeedu waxay ubaahan tahay in la-derso oo si gaara loo hubiyo, mudanihii iga horeeyay waxa ku raacsanahay in wax kastoo la samaynayo loo raaco shareecada islaamaka, wixii ka hor imanayana aynu iska ilaalino, waxaanse adkaynayaa oo inta badan soo noq-noqota, waxa uu goleheenu leeayahay gudi hosaadyo, kala gedisan inaga masuuliyadeenu waxa weeye inaynu ilaalino, xukuumadu waxa ay fulinayso waxa ay bulshadu qabanayso, sidii la rabay ma u dhacday mise uma dhicin.

Waxaan soo jeedinlahaa oo kale meelaha inta badan dayaca laga soo sheegayo ee ay waxbarashadu kow ka tahay caafimaadku laba kayahay, in gudideena daba-galku sigaara awooda u saarto.

Waxaan kaloo soo-jeedinlahaa hadii aynu xeerkan ansixino oo aan lagu dhaqmin maxay noqonaysaa waxa ka soo bixidoona, xeerkii ma lagu dhaqmay, sidee loogu dhaqmay, maxaa qabsoomay, maxaan qabsoomin. Iyana waa arrimaha inoo yaala, Mudane Gudoomiye badin maayo inahaasaan ku soo koobayaa WSC.

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha waaxda H/Qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSl** |
| ____________________________________ | ______________________________ |